LEGAL ARCHIVES CENTRE

# Compendium of Notarial Laws in Somalia
# Prepared by the Legal Archives Centre (LAC)

1. **Public Notaries Law (2020)** *unofficial document currently applied by the Ministry of Justice and Constitutional Affairs of the Federal Republic of Somalia*

2. N**otarial Law No. 1 of 2 March 1962**

3. P**residential Decree Law No. 42 of 16 May 1981**

4. R**eform of the Notarial Profession Law No. 7 of 2 February 1986**

**Xeer iyo awaamir**

**Sharci No.1 ee 2da maarso 1962**

**Sharciga Nootaayada**

Madaxweynaha jamhuuriyada soomaliya markuu arkey qodobka 62 ee dastuurka, markuu arkey sharci no.8 ee 15 febraayo 1961 markuu arkey lagama maarmaan nimada dabaqaada qodbada kala ah --------------------

Markuu dhageystey talada wasiirka ee soo gudbinta wasiirka garsoorka .

**Go'aan**

**Cutubka 1aad**

**Qodobo guud**

**Qodobka 1aad**

Nootaayo waa sarkaal guud oo u taagan qaabilaada qoraalada dadka nool iyo rabitaanka ugu dambeeya aaminaadooda guud, heynta keedka iyo ka reebitanka nuqulo dukumintiga koobitaanka nuxurka.

Nootaayuhu wuxuu kaloo damiin ka yahay xuquuqaha soo socda:

1. Hoos ka saxiixa iyo goobjooga arimaha la xiriira rabitaanada qaanuuneed iyo cilad bixinta shuruudaha gaarka ee dhinacyada.
2. Qabilaada dhaarta la xirirta qoraalka nootaayaha gaarka iyo midka ganacsiga.
3. Qaabilaada keydinta qoraalda guud midka asalka iyo nuqulka ,qoraalda garka, warqadaha iyo dukumintiga xetaa hadii dibada lagu soo qorey.
4. Saxiixida iyo ayidaada diiwaanada ganacsiga sida uu qabo qodobada sharciga ee gaarka ah iyo midka ganacsiga.
5. Qaabilaada qoraalada ka baxsan qaanuunka, iyadoo lagu kabaayo dhaar iyo la kaashiga qabiir iyo turjumid qoraalka ah.
6. Cadeynta qoraalada dukumintiga, buugaagta iyo diiwaanada ganacasiga.
7. Cadeynta shahaadooyinka iyo jiritaankooda.
8. In la raco habraaca soo socdo kadibna lagu cadeeyo awooda garsoorka:

a) Gaarsiinta iyo wareejinta diiwaanka xaaldaha uu sheegayo qaanuunka madaniga iyo ganacsiga gaara ahaan madaniga iyo ganacsiga.
b) Qeybaha xisaabaadka iyo garsoorka iyo dhamaan howlaha lagama maarmaanka ah.

**Qodob 2aad**

Xafiiska nootaayaha waa ka duwan yahay hay'ad kasta oo dowladeed ama mid rayid oo qaata ama bixiya lacag, sidoo kale qareenada, wakiilada, iyo ganacsatada.

Waxaa ka reeban axkaamtan shaqaalaha joogtada ah ee ku howlan waxbaridda(cilmiga iyo adabka) xafiisyada iyo hey'adah gaarka ah ee ka shaqeeya tacliinta.

**Cinwaanka 2aad**

**Nootaayaha**

**Cutubka koowaad**

**Tababarka nootaayaha**

**Qod. 3aad**

Diiwaanka tababarka nootaayaha waxaa haynaya golaha nootaayooyinka.

Qofkii rabo in uu is qoro tababarka waa in uu codsi usoo qortaa golaha nootaayooyinka, kuna soo lifaaqaa shahaadooyinka ogolaanshihiisa sugaya sida ku cad qodobada 3,4 ee sharci no. 8 ee 15 febraayo 1962, aan  ka aheyn cadeenta rabitaankiisa in uu rabo ka qeyb galka tababarka.

Golaha nootaayooyinka wuxuu sugayaa qoritaankiisa,go'aankiisa waana in uu noqdaa mar kasta  mid sababeysan.

**Qod. 4aad**

Xoghayaha golaha nootaayooyinka waa in isla markaa la soo weydiyo ka qeyb galka tababarka nootaayanimada waa in uu u sameeya dinwaan gaar ah.

Waa in dukumentiga ogolaashaha laga helaa macluumaadka goobta iyo taarikhda dhalasho, deganka ka qeyb galaha, taariikhda qalin jebinta ama diplomaha iyo magaca nootaayaha iyo halka uu ku sameyn doono tababarka.

**Qod.5aad**

Waqtiga tababarka waxaa laga bilaabayaa maalinta diiwaan gelinta tababartayaasha .

Tababarka waa in uu noqdaa mid wax ku ool ah joogtana ah iyadoo loo raacayo haddii uu kala go'ay iyagoo fiiro ah ka yeelanaya maamulka tababarka howlahoodi hore.

Tababarka waa in uu yeeshaa dhextaal haddii la tabarayaashu  ay awoodaan ka qeyb gal xafiiska nootaayaha xitaa waqtiyo illaa hal bil gaareysa .

Si loo hubiyo sii socoshada tababarka la tababarayaashu  waa in ay iska soo xaadiriyaan labadii bilood mar golaha nootaayooyinka, shahaadada nootaayanimadana waxaa dhameystiraya xoghayaha golaha nootaayooyinka iyadoo lagu qorayo diiwaanka la tabarayaasha .

Dhameystirka tababarka iyo isticmaalka shahaadada tababarka nootaayanimada waxaa bixinaya gudoomiyaha golaha nootaayooyinka.

**Qodobka 6aad**

Tababartaha raba sii wadashada howshiisa nootaayo kale waa inuu cadeyn usoo gudbiyaa golaha nootaayooyinka, isagoo soo gudbinaya cadeenta gudshada waajibaadka tababarka waqtiga soo socda, sidoo kale cadeenta ogolaanshaha nootaayaha uu rabo in uu ka sii wato tababarka.

Ogolaanshaha golaha xoghayaha wuxuu ku qorayaa diiwaanka la tababarayaasha.

## Cutubka 2aad

## Tababarka iyo magacaabida nootaayonimada

**Qod. 7aad**

Magacaabida nootaayanimada waxaa la go’aaminayaa waqtiga imtixaanka tababarka.

Kamana qeybgali karaan tababarka dadka da’doodu gaareyso 55sano xiliga tababarka la shaacinayo.

**Qod. 8aad**

Tababarku wuxuu ku dhameestirmayaa go’aanka wasiirka garsoorka, go’aanku wuxuu ku xadidan yahay tirada jagooyinka iyada oo la xadidaayo waqtiga tababarka, kala horeynta cadeynta waqtiga qabashada dukumintiga codsiga ee ka qeybgalayasha, ka qeyb galayaashu waa in ay fuliyaan shuruudaha ku xusan qodobka 1aad ee sharci no.8 15 febraayo 1961 kuna cad qodobada habka imtxaanka kuna xusan maalmaha uu noqonayo imtixaanka qoraalka ah.

**Qod.9**

Wasiirka garsoorka ayaa xaq u leh hubinta dhamaan arimaha daboolaya fursadaha, wuxuu go’aan ka qaadanaya ogolaansha rabitaankan shaqsi iyo in ay noqonayaan ka qeybgalayaasha.

**Qod.10**

Gudiga imtixaanka oo lagu soo magacaabey go’aanka wasiirka garsoorka wuxuu ka kooban yahay:-

1. Garsoore madax u ah.
2. Qof shaqaale ah oo ka tirsan wasaaradda garsoorka.
3. Qof aqoon leh oo ka tirsan macalimiinta kuliyadaha sharciga ama qof nootaayiiste ah.

Isla go’aankaan wasiirka wuxuu awoodaa in uu magacaabo gudigaan qof ka tirsan kaaliyayasha xogheyn ahaan.

**Qod.11aad**

Imtixaanka wuxuu noqonayaa qoraal iyo af, imtixaanka qoraalka wuxuu ka koobnaanayaa cadeeymo, aragtiyo iyo ficilo ku saabsan go’aan dad nool dhex mara, qoraalka kama dambeeysta ah ee rabitaankooda shaqsi iyo waafajinta

rabitaanka qaanuuneed ee mowduuc kasta oo la weydiisto, kulminta iyo habeenta oo mabaadi'da qaanuuneed ee la xiriirta mowduucaas isaga ah.

Imtixaanka afka wuxuu ka koobnaanayaa 3 qeybood oo kala duwan waxaana ka mid ah mowduucyadaan:

1. xeerka madaniga iyo ganacsiga gaar ahaan aragtiyada qaanuuneed ee xiriirka la lehxafiiska nootaayaha.
2. qodobada nidaaminta nootaayanimada iyo keydinta ku saabsab canshuurta howlaha.

**Qod. 12aad**

Midkasta oo kamid ah imtixaanka qoraalka iyo midka afka ah xubinkasta waxa ay leedahay 10 darajo, uma gudbaayo imtixanka afka tartamaha aan gaarin natiijadisa 18 darajo maado kasta oo kamid ah maadooyinka.

Gudiga isagoo sal ugu dhigaayo isu geeynta natiijooyinka barashada mid kasta oo ka mid ah tartamayaasha wuxuu noqonayaa mid munaasab ah.

Waxey u dhigantaa natiijooyinka, waxaa mudnaanta la siinayaa kuwa ka gudbey tartamadii hore ee imtixaanka nootaayanimada, iyadoo mudnaanta sal looga dhigayo natiijada midka ugu mudan imtixaankaas.

Isla shuruudahaan waxaa mudnaanta la siinayaa midka ugu dhameyska badan ee ugu waqtiga dheer tababarka nootaayanimada kadibna midka ugu da'da ween.

**Qod. 13aad**

Go'aanka gudiga waa in ay ka soo qeeyb galaan dhamaan golaha oo dhan.

Dhamaan howlaha tartanka waa in loo diyaariyaa si sugan iyadoo hoos ay ka saxiixayaan gudoomiyaha gudiga iyo xoghayaha.gudiga

**Qod. 14aad**

Wasiirka garsoorka wuxuu uga qeeybgali karaa tartanka xubin sharafeed, wuxuuna ka soo qeeyb gali karaa fadhiyada gudiga mar allaale markii ay lagama maarmaan noqoto, wuxuuna awood u leeyahay in uu baabi'iyo tartan kasta oo qilaafsan nidaamka.

## Qod. 15aad

liiska ka qeybgalayaasha ee uu ogolaadey wasiirka garsoorka, kadib markii la hubiyo nidaamka howlaha tartanka, kala saaridda ugu horeysa ee tirada ka qeybgalayaasha tartanka.

Dhinaca kale waa in lagu shaaciyo liiska ka qeybgalayaasha ku gudbey tartanka faafinta rasmiga ee jamhuuriyadda.

15 maalmood faafinta ka dib waa in ay u gudbiyaan wasaarada cadeyn qeexan ee goobaha loo cayimey.

Socodka mudada ku cad faqrada hore wasiirka wuxuu soo saarayaa liiska magacyada gudbayaasha tartanka iyo ogolaanshaha goobahooda iyadoo loo raacayo liiska la shaaciyey.

Iyadoo la raacayo liiska cidda ka maqan cayimida goobta laguma wareejinayo goobta, ku wareejinta goobta wasiirka wuxuu ku bixinayaa xafiiska.

## Qod. 16aad

Raadka tartank, marka ay soo dhameeystiranto tirade goobaha ku tilmaman kooxaha, sideey ahaataba awooda wasiirka garsoorka ee ah in uu ka dhex magacaabo nootaayo ka qeyb galayaasha tartanka ama aanu umagacaabin sabab la’aan, ka qeybgalaha tartanka wuxuu sheegayaa in aan lagu xusin sida liiska ugu qoran.

Waxey ku gudbisan karaan dalabkooda iska qaabkii hore, xetaa hadii la magacaabo ka dib ama xetaa hadii nootaayaha la magacaabey waajibaadkiisa ku gudan waayo muddo cayiman , xaaladaas oo kale awooda magacaabidda ma noqon karto mid uu isticmaalo, xetaa hadii la faafiyey go’aanka waana in uu tartan cusub soo sameeyaa.

## Cutubka 3aad

## Isticmaalka mehrada nootaayanimada

## Qod. 17aad

Inta aan istecmaalin nootaayaha mehradda nooyanimada waa in uu:-

1) Dhaar ku maraa guddoomiyha golaha nootaayooyinka hortiisa , in uu aamin u noqonaayo jamhuuriyadda Soomaaliya  iyo madaxweeynihiisa isagoo ilaalinaya sharciga dowladda iyo in uu ku gudanayo waajibaadka xafiiska damiir wanaagsan.
2) In uu usoo bandhigaa golaha nootaayooyinka shaabadda.
3) In uu yeesho diiwaan u gaar ah, laga diiwaan geliyey xoghyaha golaha nootaayooyinka raacsan saxiixiisa.
4) In uu guto waajibaadka ku cad qodobka 2aad.

**Qod. 18aad**

Shaabada lagu soo sheegey nambarka 2aad ee qodobka hore waa in uu cabirkiisu ahaadaa 35mm waana in uu ugu dheganaadaa astaanta qaranka iyo nambarka iyadoo aan la raacineynin cinwaanka iyo calaamad kale.

Markaa natiijada wareejinta nootaayaha ama sababo kale, wexeey keenysaa wax ka bedelka calaamadaha cinwaanka, golaha nootaayooyinka waa ina ay waa in ay ogolaadaan shaabadda cusub kadib markii uu ka noqdey tii hore.

Hadii uu dhumo shaabada, golaha nootaayooyinka waxay ogolaanayaan mid kale, taasoo naqshad gaar ah oo ka  duwanaaneysa tii hore lagu sameeynayo, hadii dib loo helo shaabadii hore ee qadiimka ma istecmaalayo nootaayaha, wuxuu isla markiiba dib ugu celinayaa golaha nootaayooyinka.

Hadii shaabada ku soo noqoto waqti go’an ee uu tilmaamayo faqrada 2aad ee qodobkaan, waa in ay ku soo noqotaa gudoomiyaha golaha nootaayooyinka agtiisa iyadoo la baabi’iyey lana saarey calaamad istilaab ah, waana in ay halkaasi u taalaa sida nootaayha aan istecmaaleynin oo kale ku xaniban golaha.

In aan lagu wareejin shaabada cusub, waa in ay damaanad u taalaa waxyaabaha lagma maar maanka u ah diiwaanka ee ku cad faqrada 3aad ee qodobkaan.

Nootaayaha waxaa ka reeban istecmaalka shaabad kale kaasoo horey u baabi’iyeen golaha nootaayooyinka.

**Qod. 19aad**

Nootaayaha waa in 60 maalmood gudahood, maalinta uu ka baxey faafinta rasmiga ee jamhuuriyadda ee la faafiyey go’aanka magacaabida uu soo dhameystiraa

qaabka uu sheegayo qodobka 18aad,waana in uu ka furaa xafiisk goobta loo cayimey.

Waqtigaas waxaa soo yereen karaa wasiirka garsoorka marka ay jirto dan guud, sida uu awoodo 60 maalmood oo kele in uu ku daro dhibaato ama sababo la cadeeyey marka ay jirto.

Cadeenta furitaanka xafiiska nootaayaha waa in uu ka soo saaraa golaha nootaayooyinka shahaado ogolaasho ee ka soo baxdey guddoomiyaha goobta laga furaayo, marka la soo buuxiyo warbixinada lagama maarmaanka ah.

**Qod. 20aad**

Axkaamta qodobada 18,20 waxay baaqi ahaanayaan xetaa xaaldaha guuritaanka nootaayaha goob kale waala dabaqayaa.

Nootaayaha u guura goob kale wuxuu xaqa u leeyahay in uu furo xafiiska waqtiga uu xaqa uu u siinayo sharciga ama waqtiga wasiirka garsoorka u gooyey ee ku xusan qod. 20aad ee isla sharcigan si uu u hanto howshiisa goobta cusub.

Awoodaas waxay imaan kartaa isla markii uu bilaabo howshiisa.

**Qod. 21aad**

Si loo xaqiijiyo habsami u socodka iyo joogteynta xafiiska, nootaayaha waa in uu cayimaa goobta uu ka furaayo xafiiska iyo dhigaalka qoraalada , diiwaanka iyo nambarka nootaayaha, sidoo kale joogitaanka xafiiska nafsad ahaantiisa, maalmaha todobaadka iyo saacadaha uu xadeyn doono guddoomiyaha golaha nootaayayaasha.

Nootaayaha kama maqnaan karo goobta wax ka badan 10 maalmood xilli kasta, waxaa ka reeban marka uu jiro howl qaran ama gudshada waajibaadkiisa shaqo.

Ka maqnaanshaha waqti dheer waa in uu ogolaasho ka helaa guddoomiyaha golaha nootaayooyinka, kaasoo aan ka badnaan karin mudo hal bil ah, wixii ka badan mudadaas waxaa bixin kara wasiirka isagoo dhageeysanaya ra’yiga golaha nootaayooyinka.

## Qod. 22aad

Nootaayaha waa in uu ku dhejiyaa dibada xafiiskiisa boor ay ku cad yihiin howshiisa gaarka ah.

Boorka waa in uu noqdaa mid ay dad weeynaha qaab fiican u arki karaan, iyadoo lagu cadeeynayo maalmaha iyo saacadaha uu furan yahay xafiiska ee isaga shaqsi ahaan uu joogo iyo maalmaha kale iyo saacadaha kale halka laga helaayo, dhinacyadana waxay kula xiriiri karaan qaabka isgaarsiinta.

## Qod. 23aad

Nootaayaha waa in uu siiyaa warbixin wasiirkiisa markasta xitaa hadii aan laga dalbin.

Nootaayaha waa in uu gutaa howshiisa hadii ay jirtoxaalad muhiim ah oo degdeg ah qatarna ah, wuxuna si toos ah ku weeydiisan karaa jiritaanka awoodiisa wax ka weyn.

## Qod. 24aad

Nootaayaha ma qaban karo qoraalada:

1. Hadii uu sharciga si u diidaayo ama dhaqanka suuban ama nidaamka guud.
2. Hadii dhinac ka noqoneyso xaaskiisa, waalidiinteeda ama qaraabadeeda dhow heer kasta, marka uu yahay dhinaca damaanadaha ilaa sadex fac xaaladaas ka noqonayaa wakiil ama mas’uul qaanuuni.
3. Hadii axkaamta ay isaga si toos u quseeyso ama xaaskiisa ama qof walidiinteeda ka mid ah, ama qaraabadeeda darajo hoose ha noqdo ama qof uu wakiil u yahay waraaqihii u saxiixey, ama warqado sir ah oo isaga marqaati ka yahay ama lagu xusey qof madax ah oo isaga diiwaan geliya.

Axkaamta ku xusan nambarka 2aad iyo 3aad ee ila sharcigan waxaa ka reeban wixii ka dhalanayo iska hor imaad xaas uu horey u furey ama waalidiinteeda ama waalidiinta xaas isaga ay ka dhimatey, darajooyinki aan soo sheegney la dabaqaayo oo aan ka ahayn xaaladaha xaraashka.

**Qod. 25aad**

Nootaayahay ma qaban karo qoraal uu dhinac ka yahay qof aan jirin , ama aanu leheen qaabka sharcigu tilmaamayo ilaa laga helo qof jira ama wakiiladiisa qaanuuniga ah.

**Qod. 26aad**

Nootaayaha wasiirkiisa wuu ka diidi karaa hadii dhinacyada bixin waayaan canshuurta soo dejinta masaariifta iyo qarashka qoraalka, aan ka eheen xaalada dadka xaqooda lagu ilaalinayo ama wax lagu siinayo ama maraga.

## Cutubka 4aad

## Raritaanka nootaayaha

**Qod. 27aad**

Nootaayaha wuxuu u rari karaa nootayadiisa goob kale, go'aanka wasiirka garsoorka marka uu soo weydiisto.

Soomana weeydiisan karo raritaanka nootaayaha meel intuu deganaa oo howshiisa ku fulinaayey ka yer sadex sanadood.

**Qod. 28aad**

Marka ay dhaboowdo rabitaanka nootaayha wasiirka garsoorka wax ogeeysiis ah ma raaxsiinayo faafinta rasmiga ee dowladda.

30 maalmood gudahood waqtiga la shaaciyey sugitaanka goobta uu degaayo waa in uu keenaa golaha nootaayooyinka codsi lamid ah, kaasoo 20 maalmood oo xiriir ah markeey ka dhmaato waqtiga dhicitaanka waxaa loo gudbinayaa wasiirka si loo mudeeyo soo jeedinta.

Ku wareejinta goobta, rajo sugayaal badan , kala saarka wuxuu noqonayaa qaab gaar, sida waayo-aragnimo shaqo, aqlaaqda damiirka qofka, natiijada tartanka magacaabida nootaayanimada, waraaqaha maaliyada iyo adeegyada qaanuuneed ee loo gudbiyey xafiiska danta guud ee ay gutaan nootaayooyinka.

**Qod. 29aad**

Nootaayaha go'aanka joojinta howlaha goobta uu u rarey waa in usoo gudbiyaa qof ahaan ama wakiil gaarka ku wareejinta keydka nootaayaha ee gobolka, dukumintigii la soo saarey diiwaankiisa iyo nambarkiisa.

## Cutubka 5aad

## Dhicitaanka magacaabida nootaayaha, hakinta iyo laalida ama howlaha guud ahaaneed ee nootaayaha

**Qod. 30aad**

Ka reebitaanka nootaayaha wuxuu noqonayaa:

1. Markuu dhameeysto da'diisa 70 sano.
2. Ka laabashada gudashada howshiisa.
3. Hadii ay ku timaado gudasho shaqadiisa sababo daciifnimo xaga maskaxda ama caafimaad daro.

Hadii daciifnimada xaga maskaxda ama caafimaadka xagiisa uu noqdo keliya waqti kooban, nootaayaha wuxuu ahaan karaa mid howshiisa ka fadhiista waqti xadidan oo aan ka badneyn hal sano hadii ay hal sano ka badnaato daciifnimada xaga maskaxda ama caafimaadka waa ka joogsanayaa howsha.

**Qod. 31aad**

Ka tanaasulida nootaayaha wuxuu noqonayaa:

1) Hadii uu aqbalo qabashada howl ka reebeysa in howsha nootaayanimada sii wato.
2) Hadii uu ka joogsado sabab la'aan labo bilod wax ka badan goobtiisa.

**Qod. 32aad**

Karti darada, laalitaanka iyo casilaada nootaayaha waxey ahaanayaan sida ku cad cutubka 2aad cinwaanka 6aad.

**Qod. 33aad**

Dhicitaanka magacaabidda, ka reebitaanka, tanaasulidda, casilaadda, ka reebitaanka, karti darada nootaayaha waxaa ku dhawaaqaya wasiirka garsoorka,wuxuuna ku soo saarayaa go'aan markii uu dhageystay talada golaha nootaayooyinka.

Qod. 34aad

Hadii uu dhinto ama si kama dambeeys ah hakin loogu sameeyo howsha nootaayah diiwaan hayaha nootaayooyinka waa in uu la wareegaa shaabadaha dhmaan qoraalada, tirsiga, siiwaanada, iyo dhamaan waraaqaha la xiriira xafiiska nootaayaha iyo wixii kale ee xiriirka la leh xafiiska nootaayaha meelo kale.

Markey dhamaanto fulinta arintaan ama ay sugnaato ka wareejinta shaabadaha la diyaariyo keydka qoraalada tirsiga iyo diiwaanada waxaa la dhigayaa diiwaan hayaha.

Xaaldaha laalitaanka karti darada ama ka reebitaanka golaha nootaayooyinka waa in uu haraa qoraalada tirsiga iyo diiwaanka nootaayaha la laaley karti darnaadey ama laga reebey ama si ku gaar ah ayeey u oolayaan diiwaank hayaha nootaayooyinka gobolka.

**Qod. 35aad**

Shaabada nootaayaha dhintey ama laga hakiyey shaqada ama u wareegey goob kale waa in aya taalaa oo lagu ilaaliyaa golaha nootaayooyinka agtoodahadii aaney suurto gal aheyn in ku warejinta nootaayaha waxaa la dhigayaa diiwaan hayaha nootaayooyinka gobolka.

Soo saarida waxay ahaaneysa amrka guddoomiyaha golaha nootayooyinka, calaamad, faqrada afaraad ee qodobka 19aad halkaas ayuu yaalaa isagoo aan anfac laheyn laakin lagu ogaanayo.

Waa in si cad usugnaato yaalitaanka keydka nootaayaha si ku meel gaar ah loo hakiyey howshiisa ilaa waqtiga hakinta.

## Cutubka 6aad

## wakiilada

### Qod. 36aad

Markii ay jirto maqnaansho, laalitaan, karti daro, cudur sababey ama wax kasta oo keeni kara xil gudasho la'aan ku meel gaar ah nootaayaha ma qaban karo howsha wasiirka garsoorka isagoo fiirinayo codsiga nootaayaha ama xafiiska markii uu dhageeysto talada golaha nootaayooyinka wuxuu ka magacaabi karaa wakiil dhamaan dadka soo codsadey nootaayanimada dhaxdooda ama nootaayayaasha shaqeeya ee udhow goobta.

Wakiilka wuxuu ku qabanayaa dhamaan howsha danta iyo nootaayaha la fadhiisiyey, waajibaadka dhaamaana mawada qaadayo sidoo kale mayeelanayo xaq la wareegidda mustaqbalka.

### Qod. 37aad

Waa isku mid dhamaan wakiilada qodobada nidaamiya nootaayaha marka la dabaqayo. Shaabada wakiilka wuxuu ka koobnaanayaa qoraal yar(N……….N………….N……..) wakiilka(N…….N…….N…….) nootaayo (N…….N……)

Nootaayaha wakiilka ah wuxuu mas'uul ka yahay xiliga kooban ee uu uistaagaya howsha loo wakiishay, faa'idada ka dhalatana waa mid qiimeynteeda leh.

## Cinwaanka 3aad

## Qoraalka nootaayaha

## Cutubka 1aad qaabka

## (qaabka qoraalka nootaayaha)

### Qod. 38aad

Qoraalka nootaayaha ma noqonayo mid ansax ah hadii aan goobjogayaal ka eheen dhinacyada, hadii sharcigu tilmaamin si ka duwan iyo 2da marqaati.

Goobjooga marqaatiyada muhiim ma aha hadii qoraalada kuu qoran 1-8 ee qod. 1aad sidoo kale tasdiiqinta waraaqaha ku xiran nidaamak maaliyadda (jeegaga) iyo guud ahaan warqadaha ganacsig ee waraaga.

Wuxuu kulminayaa hdamaan qoraalada bilowg ilaa dhamadka, xetaa xaaladaha qofka uu u qoraayo maanadiisa qof kale, waa qadab inuu mideeyaa rabitaanka 2da dhinac marka la qoro lana aqriyo qoraalka waa in rabitaankooda ay ku ogolaadaan.

**Qod. 39aad**

Dhamaan qoraalada dadka nool oon ka eheen hibada iyo heshiiska guurka, dhinacyada yaqaana wax aqrista iyo wax qorista wexeey awood uleeyihiin tanaasulid wixii lagu heshiiyey iyadoo loo kaashanayo qoraalka marqaatiyo, notaayaha wuxuu ka sameeynayaa qoraal deg deg ah mabaadi’da heshiiskaas.

Hadii dhinacyada mid kood aanu ogoleen tanaasulida qoraalka waa in uu haadaa mid u dhameystiran joogitaanka marqaatiyada. Qoraalka wuxuu ku dhameystirmayaa ogolaanshaha dhinacyada iyo joogitaanka marqaatiyada.

**Qod. 40aad**

Nootaayaha waa in uu shaqsi ahaan u hubiyaa xaalada shaqsi ee dhinacyada.

Hadii uu aqoonsan waayo waa in lahelaa 2qof oo lagu kalsoon yahay ee yaqaana qofka wexeeyna noqon karaan marqaatiyo.

**Qod. 41aad**

Marqaatiga waa in uu qaan gaar ahaadaa, muwaadin soomaaliyed ahaadaa ama ajnabi leh degenaansho ama leh xuquuq awooda isticmaalka xuquulka madaniga ah,laakin aanu dano gaar ah ka leheen qoraalka.

Marqaati manoqon karo odeyga da’da ah, qof dhega la’a, qof af la’a, kuwaas lama horkeeni karo nootaayaha hortiisa sidoo kale dhinacyada xiriirka la leh ee ku qoran qodobka 25aad sidoo kale kuwa aan caafimaad qabin ama aan wax saxiixi karin.

Kuwa niyadsamida ku sameeyaan waa in ay codsadaan sunaanshaha marqaatiga laakiin waa in ay noqon mid is hortaaga xiriirka iyo faqrada aan soo tilmaannay, mana aha midka aan waxba aqoonin iyo midka aan waxba saxiixi karin.

**Qod. 42aad**

Qoraalka nootaayaha waa in uu lahaadaa qaabkaan soo socda:

Jamhuuriyada soomaaliya
Qoraalkana waa in uu ka kooban yahay:

1. Cadeeynta iyadoo qoraal ah, sanadka, bisha, maalinta iyo meesha ay ugu timid.
2. Heybta, iyo calaamada goobta nootaayaha.
3. Heybta, goobta iyo taariikhda dhalasho, degnaanshaha shuruudaha dhinacyada, marqaatiyada, niyadsamida hadii dhinacyada midkood uu ugu soo qeybgaley qoraalka wakiil ahaan arimahaas looga sameeynayo xishmeyn dhinacyada dhexdooda oo keliya ee waa xishmeyn wakiiladooda.

Wakiilka waa in uu ugu qeyb galaa qoraalka nafsad ahaantiisa hadii asalka yahay iyo hadii nuqulka yahayba ama hadii asalka iyo nuqulkaba aan laga heleynin qoraalka nootaayahay dhintey.

4. Cadeynta hubinta qoonsiga dhinacyada shaqsi ahaaneed iyo hubinta macluumaadkooda  lagu helo habka niyad samida.
5. Tilmaamida ugu yeraan marka ugu horeysa qoraal isku mid ah walxo isku mid ah isku tiro ah loo sameeyo uleedadeeda qaab isku mis tahay.
6. Sawirka dhabta ah ee walxaha isku midka ah qoraalka ujeedadeeda,qaab aan la awoodin in wax looga bedelo mid kale.

Hadii uu qoraalka yahay mid ku saabsan hanta maguurto ah marka waxaa loo sawirayaa sii ay suurto gal utahay iyadoo la cadeeynayo dabeecadahooda meelaha laga helo, xudduudahooda, iyo xaqiijinta aqoonsiga maguurtada.

7. Tilmaamida cinwaanka qoraalka iyo mudadeeda si loo haleelo nuxurka qoraalka.
8. In la cadeeyaa qoraalka leh waraaqaha maaliyada taariikhdeeda nootaayaha loona aqriyey dhinacyada iyadoo goob jog yihiin marqaatiyada hadii ay tilmaameyso.
9. In lagu sheego qoraalka nooyaha qoray ama dadka uu isaga ku kalsoon yahay iyadoo la tilmaamayo waraaqaha inta bog ee uu ka kooban yahay qoraalka.

10. Saxiixitaanka iyadoo ay la socdaan cadeynta heybta dhinacyada, kuwa la aaminsan yahay, turjumaanada, marqaatiyada iyo nootaayaha.

Kuwa la aaminsan yahay weey fogeeysan karaan cadeynta sida ku qoran faqrada 4aad xaaldaas waa in uu saxiixaa cadeynta ka dib nootaayaha waa in uu sheegaa.

Hadii dhinacyada kuwa la aaminey midkood aanu aqoon ama aanu saxiixi karin waa in uu cadeeyaa sababta uu u diidey nootaayahana waa in uu sheegaa cadeyntaas.

11. Rabitaanka ugu dambeeya ee qoraalka, xadeynta waqtiga saxiixa marka la gaaro xadeyntaas waa in si cad loo sameeyaa marka ay dhinacyada weydiistaan, ama nootaayaha uu u arko munaasab, ma qoraalo kele.
12. Qoraalka waa in ka koobnaadaa dhowr waraaqaod, waana in ay warqad kaasta ay saxiixnaataa,dhinacyada,  tujumayaasha, marqaatiyada iyo nootaayaha waana in uu ku aqbalaa waraaqaha saxiixa ugu dambeeya.

Saxiixa la saarayo waa in ay saarnaataa warqad kasta oo qoraalka ka mid ah,iyo warqadaha maaliyada ee qoraalka ,waana in uu aqbalo waraaqaha diiwaanka guud. Haddii dhinacyada ka soo qeyb galay, ay la socodaan ayna owoodi karaan in ay saxiixan, ayna ogolaadan sida faqrada lixaad ku qoran,markaa saxiixoodu mid kasta oo iyaga ka mid ah wuxuu wakiil ka noqonaya dhinaca soo wakiishay, ee danohooda kaka duwan.

Saxiixa fudud ee nootaayaha ee  waraaqaha dhexe ma aha mid ahmiyad leh haddii qoraalka dhamaan ku saxiixo gacantiisa.

**Qod. 43aad**

Saxiixa nootaayaha wuxuu ahaanayaa ugu dambeynta qoraalka waana in ay saaenaataa tiimbarihiisa.

**Qod. 44aad**

Warqada asalka ee qoraalka nootaayaha waa ay ku qornaataa qad aan tirmeeynin, ahna mid la fahmi karo, si fududna lagu aqrin karo, aanu yeelan daldalool ama meelo banana oo aan xariiq marsaneyn, soo gaabin la’aan, tirtir la’aan, bedelaad la’aan qoraalka korkiisa.

Hadii ay danta keento baabi’inta ama wax ku kordhinta qaar ka mid ah qoraalka saxiixa dhinacyada horteed kuwa la aaminsan yahay ama turjumaha ama marqaatiyada nootaayaha waxaa ku waajib ah:-

1) Tirtirida xaqiijinta ereyada la rabo in la baabi'iyo ama in loo bedelo qaab si fasiix ah loo aqrin karo mar kasta.
2) In uu qaataa ereyada la bedelaayo ama lagu kordhinayo halka ugu dambeysa qoraalka daraf ka raacis ah inta inta aan la saxiixin ka hor.
3) In la sheego ugu dambeynta qoraalka iyo ugu dambeynta marka la saxiixayo nambarka iyo tirade ereyada la tirtirey, tirade ereyada daraf ka raacinta, sidoo kale hadii la sameeyey markii qoraalka la aqriyey ka dib.

Xaaladaha kuwa la'aaminey ay gadaal ugu soo biiraan qoraalka marka la dhameystirey qoraalka ka dib sida ku cad faqrada 10 ee qodobka 44aad qofna laguma bedeli karo qofna laguma kordhin karo, waxaa ladoorbidaa joogitaan la'aantood, waana in la hubiyaa heybtooda qof ahaaneed.

Ku daritaanka iyo wax kabedelka dhinacyada doonaya in ku soo biiraan saxiixitaanka ka dib iyo marqaatiyadooda, laakiin intaa aanu nootaayuhu saxiixin ka hor, waa in lagu hergeliyaa cadeyn gaar ahaaneed, ereyada lagu kordhiyey ama waxaa lagabedeley qoraalka waan ain saxiix cusub la saaraa.

Tirtirka iyo wax ku kordhinta iyo wax ka bedelka la sameeyey waxaa loo ogolaanayaa qaabka kor ku xusan.

**Qod. 45aad**

Qoraalka nootaayaha waa in lagu qoraa luqada soomaaliya ama carabi ama ingiriis hadba sida lagama maarmaanka yahay qoraalkana waa in uu noqdaa hadba sida uu u gaaro ka soo qeybgalaha ama turjumaha ayadoo ku dhameystirmaayo rabitaanka dhinacyada.

Turjumaha waa in uu ahaadaa mid shuruudaha lagama maarmaanka ah leh si uu u noqdo marqaati e ma ahaan karo mid laga soo dhex doortey marqaatiyada ama kuwa la aaminey, waana in la marsiiyaa dhaar nootaayaha hortiisa amaanada xafiiskiisa wuxuuna sameeynayaa qoraalka la soo xusey.

Codsiga dhinacyada ee qoraalka asalka ah ama si hoose in uu uga soo qeeyb galo turjumaha luuqada labada dhinac 2da dhinac ay garanayaan si uu u tarjumo, waxa la turjumeyna waa in ay saxiixaan dhinacyada, turjumaha, marqaatiyaha, iyo nootaayaha.

**Qod. 46aad**

Hadii dhinacyada midkood qeyb ahaan ama gebi ahaan aanu wax maqleynin markaa waa in uu aqriyaa qoraalka aan soo xusney.

Haddii uu yahay mid il la'a ee aan waxba aqrin karin waa in uu ka soo qeyb gala qof turjubaan ah oo ay soo magacaacwday maxkamadda degmada, uu degan yahay

qofka isha la’a lagana soo magacaabaa dadka isaga la tacaamala ee garanaaya qaabka wx loo fahamsiin karo sida calaamadaha iyo ishaaraadka uu wax ku fahmaayo .
Turjumaha waa un uu ahaada mid leh shuruudaha lagama maarmaanka leh si uu u noqdo marqaati waana in uu maaraa dhaarta ku xusan faqarada 3aad ee qodobka 47aad waana in laga soo doortaa dadka qaraabadiisa ah,mar keliya isku noqon karo marqaati iyo mid la aamninay.

**Qod. 47aad**

Haddii dhinacyada mikood uu noqdo dhega la’a am ail la’a iyo dhega la’a, ka sokow ka soo qeyb qalka turjubaanka ee qodobka aan soo dhaafnay, waa in fiiri loo yeeshaaarrimaha soosocda:

-dhega laawe ama af laawe ee yaqaana wax qorid iyo wax aqris, waa in uu aqriyaa/qoeaa ka hor inta aan la saxiixin, wixii uu aqriyay waa in uu ku ogolaadaa rabitaankiisa.

-haddii uusan aqoonin ama aan saxiix garaneyn, waxaa lagama maarmaan noqonaaya calaamadaha la midka ah, sido kale ka soo qeyb galka maarqaatiyada mid ka mid ah, ama ka soo qeyb galka turjubaann kale, keliya faqradaha ku qoran bilowga qodobkii hore.

**Qob.48aad**

Qoraalka Nootaayaha waa wax kama jiraan, keliya raadka uu lahaan haddii uu lahaan lahaa qoraal gaar ah, haddii ay saxiixaan dhinacyada xaaladaha soo socda:

1. Hadii ay ka soo gaarto nootaayaha ka hor inta aan la shaacin go’aanka magacaabidda ama ka hor inta aan la shaacin go’aanka hakinta, xitaa si ku meel gaar loogu joojiyo istecmaalka.
2. Hadii ay ka soo gaarto nootaayaha jebinta qodobka 25aad ee faqrada 2aad sidoo kale jebinta nambarka 3aad ee qodobka 25aad isku darka baabi’inta go’aanka tilmaameyso isla lambarkaas.
3. Hadii go’aanka eegidda ee qodobada 40,41,43,47,48,49 iyo lambarka 10aad ee qodobka 44aad.
4. Hadii uu kamaqan yahay taariikhda uuna sheegeyn cadeynta goobta ay ka soo gaartey.
5. Hadii nootaayaha aanu leheen taariikhda la aqrin qoraalka dhinacyada, goobjoog marqaatiyada inta ka soo qeyb galeysa.

**Qod. 49aad**

hadii uu jiro cadeynta baabi'inta qoraalka nootaayaha ee awooda garsoorka kama dambeysta ah, gudoomiyaha golaha nootaayooyinka, kuna timid codsiga dhinaca daneynaaya gaarsiinta nuqul ku dhawaaqidda go'aanka, kaaliyaha awooda maxkamadaa eek u dhawaaqdey sugnaanshaha wax ka bedelka qoraalkii asalka.

**Cutubka 2aad**

**Ilaalinta qoraalada nootaayaha iyo diiwaanka nootaayaha**

**Qod. 50aad**

Nootaayaha waa in uu meel aamin ah ku xanaaneeyaa dukumintiyada iyo wixii xiriir la leh.

a) Qoraalka isaga soo gaarey waxaa ka reeban wixii sharciga uu qeexey ee ka reeban.

b) Qoraalada aktiisa lagu keydiyey ee cidsiga dhinacyada ku yimid ama go'aan sharci lagu keydiyey.

Waana in uu u habeeyaa qeyb qeyb sida ay u kala horeeyaan waqtigooda qoraal kasta waa in uu lambaro isku xiga lahaadaa, lifaaq kasta wuxuu yeelanayaa isla lambarada is xigxiga ee lagu lifaaqey xaraf ee ka sooceysa.

Dardaaran guud ka hor inta uunsan dhiman dardaarmaha, dhowritaanka sirta dardaaranka ee qoraal ahaan loogu keydiyo nootaayaha ka hor inta aan la furin ama la faafin waa in uu ku haayaa gal gaar ah.

Dardaaranka guud ee dhimashada kadib markuu geeriyoodu dardaarmaha codsiga qof kasta oo dan ka leh iyo kuwa kale furitaanka shaacinta ka dib, waa in uu u gudbaa galka iyo diiwaanka gaarka ee qoraalka, rabitaankii u dambeeyey ee qoraalka nootaayaha, kala horeynta dhacdooyinka dardaaran kasta waa in uu lahaadaa gal gooni ah oo leh taariikh iyo kala horeeyaan galka codsiga dardaaranka guud, furitaanka sirta dardaaranka iyo faafinta dardaaranka qoraal ahan.

## Qod. 51aad

Nootaayaha cidna uma soo bandhigi karo asalka qoraalka ee aan ka  eheen xaaldaha uu sheegayo qod 63aad kumana qasbana in ay iyaga soo bandhigaan ama iyaga lagu aamino marka laga reebo xaaldaha ama qabka sharciga xadeynayo.qoralka

Xaaldaha aan sharciga sheegin habka soo bandhigida iyo keydinta qoraalka nootaayha intaanu wareejin waa in uu nuqul sax ah ka sameeyaa oo lagu xaqiijiyo midka asalka ah oo lagu oo xareyn doono guddoomiyaha maxkamadda gobolka taasi waxaa lagu cadeeynayaa in nuqulka qoraalka lagu soo bandhigey lagu soo bandhigey laguna keydiyey.

Nootaayahu waa in uu dhigo halka laga qaadey nuqulka asalka ee qoraalka mid kale oo nuqul koobi ah ilaainta laga soo celinayo hadii muhiim ay noqotana koobi ayuu siinayaa waana in ku dhameystirmaa habka qoraalka.

## Qod. 52aad

Qofka ku keydiyey nootaayaha dukuminti wuxuu xaq uleeyahay in uu codsigiisa dib ugu noqsado, waxaa shardi u ah in ay ahaato mid umuuqato in ay sidaas usoconeyso danihiisa gaarka.

Waan in uu ku soo celiyaa habkii uu sameeyey keydinta mid lamid ah, marka laga reebo marka uu dardaaranka uu ahaa mid ku xiranaa dukuminti ama qoraalo kale oo u baahan wax ka bedelka.

Qoraalka keydka waa in uu nootaayaha keydiyaa inta ay tahay diiwaanka wuxuuna qorayaa waxyaabaha lagu kordhiyey.

## Qod. 53aad

Nootaayaha waa in uu ku ilaaliyaa qoraalka labo diiwaan mid uu ku qoraayo heshiiska dadka nool kaasoo ku shaqeeynaya wixii raad sharci ee canshuurta diiwan gelinta mida kala uu ku qoraayo heshiiska ugu dambeeya waana in maalinle loo qoraa, aiyadooo ayna leheen meelo banaan iyo xariijimo, tirooyin taxane ah, dhamaan rabitaanka ugu dambeeya ee ka soo gaara heshiisyada dadka nool sida ay ukal horeeyaan iyadoo ku tiirsan midkii qasadka ahaa, diiwaan gelint heshiiska dadka nool mid kasta wuxuu yeelanaya:-

1. Lambarada xiriira.
2. Taariikhda cadeynta heshiiska meesha ka soo gaartey.
3. Nuxurka heshiiska.
4. Heybta iyo dhinacyada iyo deegaanadooda.
5. Calaamado kooban ee sheega ujeedada heshiiska, sheegidda qiimaha iyo sicirka ee xariirka la leh heshiiska nuxur ahaan xuquuq dhab ah, ka faaideysiga ma guurtada xaaldaha la midk ah .
6. Diiwaan gelinta iyo bixinta canshuurta heshiiska.
7. Xushmada la siinayo nootaayaha.
8. Fiiro siinta.

Diiwaan gelinta heshiiska kama dambeysta ah waxaa la qoraa oo keliya macluumaadka ku jira afarta ugu horeysa deegaanka.

Warqadaha diiwaanka waa in ay ahaadaan midka xariijimaha leh oo godad afar geesoole leh, nootaayahana waxaa ka reeban in uu ku qoro hal heshiiska wax kamid ah warqad kasta.

Lambarada isku xiga ee heshiiska iyo diiwaanka ee sheegaya qodobka iyo 52aad waxay soconayaan in uu nootaayaha howshiisa ku gudanayo xaruntiisa, ka wareegida xaruunta nootaayaha waa in uu u sameeyaa lamabareen cusub.

Nootaayaha waa in uu saxiixaa warqad kasta ee diiwaanka uuna ku saxaa qeyb kasta oo kamid ah bandhig xarfo isku xiga ee heybta dhinacyada.

**Qod. 54aad**

Diiwaanada waxaa u qeeybinaya nootaayaha golaha nootaayooyinka, diiwaan kasta ka hor inta aan la istecmaalin, lambar lasiin , aanu saxiixin, warqad kastagudoomiyaha golaha nootaayaha boga hore waa in lagu cadeeyaa in ta warqad uu ka kooban yahay qoraalka.

## Qod. 55aad

Nootaayaha waa in uu gudbiyaa diiwaan hayaha nootaayaha gobolka, bil kasta nuqul ka mid ah in heshiis soo gaarey, bisha, lasoo dhaafey.

Nuqul kasta waa in uu ku saxiixnaadaa kuna daabacnaadaa diiwaankiisa.

Hadii aan nootaayaha soo gaarin bishaas wax heshiis wuxuu gudbinayaa cadeyn wax la’aan ah.

## Qod. 56aad

Xaalaha uu nootaayaha gudbinayo heshiis sharci ah waa in ay goob jog ka noqdaan cidda awooda u leh heshiiskaas waana in loo furaa feyl cusub oo u gaar ah oo ka kooban bogag lambareeysan saxiixana diiwaan hayaha nootaayaha gobolka, isla waqtigaas waa in la tilmaamaa heshiiska wuxuu la xiriiro waxaa ka reeban wareejin diiwaanka heshiisyada ku celiska ah.

Xaaldaas waa in fiiro loo yeeshaa tiirka tirsiga ee ka hor imanaya heshiiska iyo warqadaha dheeraadka ah ee qeyb ahaan la socda isla tirsiga awooda la soo bandhigi doono tirsiga waa in si lamid ah loogu soo bandhigaa tirsiga ugu dambeeya ee diiwaan geliyey maalinta soo bandhiga iyo soo celinta.

## Qod. 57aad

Nootaayaha tirsiga ka sokow waa in uu hayaa diiwaan ku qoran lambar texane ah kuna cadyihiin xaddiga iyo qiimaha maalinlaha ee loogu aaminey heshiiska lagu qorey hortiisa tilaabooyinka awooda garsoorka lamid ah.

Laga bilaabo taariikhda heshiiska la gaarsiiyey ku wareejinta danlayaasha,qarashka iyo qiimaha aan soo sheegney.

Nootaayaha waa in uu qoraa qeyb kasta kadib markii lahergeliyo howsha ay dhameystiranto gudshada howsha la soo gaarsiiyey.

Diiwaan gelinta golaha nootaayooyinka waa in uu haadaa mid lambareysan saxiixan, yeelataana qaabka uu yahay heshiiska.

Diiwaan gelinta lama xariirto amaanada nootaayah ee loogu tala galey bixinta canshuurta heshiiska.

## Cutubka 3aad

## Nuqulka, nuxurka, iyo cadeeymaha

### Qod. 58aad

Nootaayaha waa in laga helaa aktiisa qoraalka heshiiska inta ay socoto howsha nootaayaha asaga oo keliya ayaa xaq u leh baaritaanka iyo aqrinta, siinta nuqulka, nuxurka iyo cadeynta heshiiska qoraalka ee soo gaartey, ama lagu keydiyey.

Umana baahna amar qaadasho hubinta iyo aqrinta nuqul siinta heshiiska ugu dambeeyey, siinta nuqulka iyo cadeeymaha inta uu noolyahay dardaarmaha, haduusan darrdaarmaha la mid noqon qof leh ama gaar ah ee qaab ahaan lamid ah.

### Qod. 59aad

Go'aanka qodobka 46aad ee qaabka loo soo qoraayo nusqada asalka iyo wax ka bedelidiisa wax ku kordin ama wax ka dhimid xetaa waxaa lagu dabaqi karaa nuqulka nuxurka ama cadeeymaha isbedelada laakiin wax ku kordhinta asalka qaabka uu sheegayo qodobka wuxuu ku dhameystirmayaa dhil ahaan ee ma aha qalad daraf ka raacin.

### Qod. 60aad

Nootaayaha waa in uu ku qoraa dhamaadka nuqulka ogolaasha wakiilada dhamaan wax yaalaha la socda nuqulka asalka wixii aan ka eheen tan hada ugu dambeeysa ee weeydiisanaya nuqulka tanaasuidda xaaldaas, nootaayaha waa in uu ku sameeyaa nuqulka ka tanaasulidda ayadoo ku xusan taariikhda iyo daabacadda waxaa raacsan ee aan nuqul eheen.

Nuqulka daabacaada iyo cadeymaha waa ineey lahaataa ugu dambeyn taariikhda ogolaanshaha waana in eey lamid noqotaatan nootaayaha ee la socda nootaayaha saxiixa shaabada iyo cadeynta nuqul lamid ah midka asalka hadii nuqulka iyo cadeynta ka koban yihiin waraaqo fara badan, warqad kastaa waa in la saxiixaa nootaayah oo dhinac ka ah.

Ka sokow qaabkaas nootaayaha waa in uu keysiyaa nuqulada la siiyey hadii ay soo baxaan dhibaatooyin kale oo sharci.

## Cutubka 4aad

## Qoraalda la soo saaro ee asalka iyo sugitaanka saxiixa

### Qod. 61aad

Marka laga reebo xaaladaha sharciga tilmaamey nootaayaha wuxuu soo saari karaa dhinacyada keliya qoraalada ku asaabasan wakaal ma wakillo ama heshiisyo ku saabsan sugutaan ama qoraalada muhiimka u ah fulinta halhowl keliya, ama wakiilada istecmaalka xaqa doorashada xaaldaha gaarka ee sharciga iyo siyaasada iyo maamulka tilmaamayo.

Iyadoo si cad u qeexaya nuqulka qoraalada lambar 1,4,5,6,7 iyo qodobka 1aad iyo qoraalda sugitaanka ee qodobada 40 iyo 65.

### Qod. 62aad

Nootaayaha nuxurka qoraalka ku gudbin karaa email ama taleefoon.

Hadii koobitaanka qoraalka xadeeysan yahay waxaa dhameeystiraaya nootaayaha isagoo ka diyaarinaya qoraal gaar ah iyadoo dhinacyada joogaan.

Koobitaanka aan sare ku soo xusney ee emailka waa in lagu qoraa diiwaan gaar ah ee nootaayaha leeyahay kaas oo lagu sameeynayo calaamad xaraf ah lambarka diiwaanka ee qoraalka ayadoo la raacainayon saxiixa tiimbaraha.

Qoraalka telegaraamka wuxuu keedsananayaa xafiiska telegaraamyada, halkaas ayuu ku keedsanaanayaa muddo 1sano kadib keedka nootaayada gobolka hadii soo gudbinta uu yahay taleefon ahaan, markaa waa in lagu sameeyaa 2 nootaayo oo kala duwan, shaqsi ahaantooda iyo sida ay u kala horeeyaan waana in lagub qoraa shaqsiyadooda, ujeedada isgaarsiinta ee xafiiska isgaarsiinta.

Nootaayaha wuxuu u turjumayaa isgaarsiinta qoraala ahaan isagoo ilaalinyo kala horeynta gudbinta.

Qoraalka wuxuu ahaanayaa mid yaala nootaayaha aktiisa waxaana ka sameen kara nuqulo.

Isgaarsiinta telegaramka iyo talefonka, sida kor ku tilmaaman waxaa loo qaadanayaa in uu la mid yahay qoraalka asalka ah inta laga helaayo cadeen burisa.

## Qod. 63aad

Sugitaanka saiixa la saaro halka ugu damneeyso qoraalka gaar iyo lifaaqyada qaraaqaha dhaxdooda ah ee iyaguna saxiixan waa in ay ahaataa cadeynta iyo saxiixyada mid raacsiisan saxiixa nootaayaha, marka la cadeeyo marqaatiyada, kuwa la aaminey, taariikhda iyo meesha lagu sameeyey.

Marka la saxiixo darafyada iyo warqadaha dhexe wuxuu ku dhameestirmayaa in lagu dhameeystiro saxiixa nootaayaha.

Qoraalka gaarka ee uu sugey nootaayaha, wuxuu ahaanayaa mid sax ah hadii aaney ka imaanin dhinacyada wax lidkeeda ah,wuxuu noqonayaa sidiisa xaalad kasta, laakiin waa in marka hore ay ahaataa ilaalinta nootaayaha la diiwaan geliyey waqtiga uu sharcigu sheegayo, iyo canshuurta diiwaan gelinta.

## Cutubka 5aad

## Xushmada iyo xuquuqda kale ee nootaayaha iyo kharashka

### Qod 64aad .

Nootaayhaa wuxuu xuquuq ku leeyahay qoraal kasta, nuqul, nuxurka, ama cadeenta iyo howl kasta ee ku saabsan mehradiisa , in ay ahaatoa dhexdhaxaad dhinacyada kale, marka lagu daro kharashka xuquuqda dheeraadka ah.
Dariifada xushmada iyo xuquuqaha iyo cabirka qarashka celinta waxaa lagu xadidayaa go'aanka wasiirka garsoorka, kadib markii uu dhageeysto golaha nootaayooyinka.
Xushmada iyo xuquuqda dheeriga ah eek u sugnaadey howsha nootaayaha waa mid gaar ah.

### Qod. 65aad

Haddii qoraalku ka koobanyahay heshiis kala duwan ,wexey  xushmaddu noqonaysaa inta heshiisyada ay la'egyihiin .

Haddii qoraalku ka koobanyahay go'aanno farabadan ,waxay yeelanaysaa xushmado kala duwan ,hadba inta uu la'egyahay  heshiiska lakala galay,dabeecadda midkasta.waxaa mudnaanta lasiinayaa sidii xushmadda u noqon lahayd in meel la'iskuugu keeno kuna jirto danta nootaayaha,haddii aan dheeraad

Ku noqonnin dhinaca kale .

**Qodobka 66aad**

Haddii qoraalka lagu baabi'yay eedayn nootaayaha darted ama nuqulka ama nuxurka ama caddaynta ee uu usameeyeeyay qaab aanla'aamini Karin oo keenayo nidaam darro,mawaajibayso xushmadaha qaarkood xuquuq iyo canshuur celin.

Xaaladahaas oo lagu daray magdhow khasaaraha uu sharciga tilmaamay,nootaayaha waa 'inuu usooceliyaa dhinacyada kharajka ay bixiyaan .

**Qodobka 67aad**

Waxaa kareebban xaaladaha uu sheegayo qodobka 27aad ee ku saabsan dadka laga dhaafey badbaadin dhinacyada waxey ka qaadan karaan iyadoo cadaan ah nootaayaha lacagta xushmada iyo qarashka canshuurta.

Nootaayaha waa ka diiidi karaa qof kasta oo weydiista diritaanka nuqulka ,nuxurka iyo cadeynta inta laga cadeeynayo lacagta ma canshuurta sida ay ukala horeeyaan guddi ahaan ama hadii ay jiraan dodo ama khilaaf loo gudbiyey golaha nootaayooyinka.

**Cinwaanka 4aad**

**Golaha nootaayooyinka**

**Qodobka 68aad**

Golaha nootaayooyinka waxey xaruun ku leeyihiin muqdisho gaar ahaan maxkamada racfaanak.

Wexeeyna ka kooban yihiin:-

a) Guddomiyaha maxkamada racfaanka ee muqdisho "guddoomiye".
b) Geryaqaan ka tirsan xafiiska ilaalinta kaasoo sanadle usoo magacaabaa xeer ilaaliyaha guud ee qaranka.
c) Nootaaye shaqeeya oo sanadle usoo magacaaba wasiirka garsoorka.

Howsha waxaa ka shaqeeynaya kaaliyaha sare maxkamada racfaanka.

**Qodobka 69aad**

Golaha nootaayooyinka  marka lagu daro awoodda kale ee sharciga siinayo  waxay awood uleeyihiin:

1-kormeerka  kaydka  howlaha  iyo asluubta  nootaayada iyo  gudahashada howshooda sida saxda ah .

2-kormeeraka  asluubta tababartayaasha iyo qaabka ay u  gudanayaan waajibaadkooda shaqo.

3-kormeerka habsami u socodka howlaha kaydka nootaayada gobolka.

4-soo bixinta, codsi kasta cidd awoodda u leh,soo bandhiggiddooda.

5-qaabeynta  iyo cusboonaysiinta tababarka nootaayanimada ,kuwa dhamaystay iyo tababartayaasha cusub.

6- codsiga waxay ka bilaabanaysaa xallinta is qabad  nootaayooyinka iyo nootaayaasha iyo cid saddaxaad,ha ahaado,soocelinta waraaqaha ,ha noqoto kharajka ama xishmada ama ujeeddo ama

Waxkasta  oo xiriir la leh howsh nootaayaha.

**Qod . 70aad**

Xalalka  Golaha Nootaayooyinka Waxay Ku Gaaraan  Aqlabiyadda codka .

Xoghayaha waa in uu ururiyaa qoraalada kulamada , waana in uu xanaaneeyaa dhamaan warqadaha la xiriira mowduuca ,Guddoomiyaha galaha ayaa awood u leh in uu saaro nuqul qoraalada kulamada waxaa saxiixaya Gudoomiyaha iyo Xoghayaha .

**Qod. 71aad**

Golaha Nootaayooyinka hawlahaas ka sokow , Waxay kaloo awood  u leeyihiin hab raac anshax marinta howlaha Nootaayooyinka .

Goluhu wuxuu awood u leeyahay in ay dabaqaan Qodobada ilaalinta faafreebka iyo Tacsiirka .

**Cinwaanka 5aad**

**(Diiwaanka Nootaayaha Ee Gobolka )**

**Qod. 72aad**

Maxkamada racfaanka gobol kasta waxa ay asaas u tahay diiwaanka tooyaayooyinka ee gobolka.

Keydiyaha diiwaanak nootaayooyinka gobolka iyo kaaliyaha sare ee maxkamada racfaanka gobolka.

**Qod.73aad**

**Diiwaanka nootaayooyinka gobolka Waxaa lagu kaydinayaa laguna xanaanaynayaa :**

1) Qoraalada iyo diiwaanada nootaayooyinka geeriyooday qayb ahaan ama kuwa si joogto ah ama si kumeel gaar ah looga fariisiyey hawsha nootaayaha ama u wareejiyey xaruntiisa Gobol.
2) Nuqulada laga baabi'iyey diiwaanka sida uu sheegayo Qod 56aad .
3) Telagaraamyada la helay ama qoraalka laga sameeyey Telfoonada lasoo diray sid u sheegayo Qod 63aad .

Keydiyaha wuxuu masuul ka yahay Xanaaneynta iyo keydinta dhamaan dukumiintiyada lagu keeydiyey diiwaanka waa in uu si hagaagsan u ilaaliyaa dhab u gudashada masuuliyada nootaayooyinka ka saran diiwaanka iyo in ay cadeeyaan golaha nootaayooyinka Jebinta goboladooda Nootaayayaasha Marlabaad.

**Qod 74aad**

Marka ay socoto kaydinta qoraalka asalka iyo diiwaanka kaydiyaha isla markiiba waxay Bilaabayaa diriraanka iyo xaqiijin hawshaas iyada ah , kaydiyaha wuxuu diyaarinayaa warbixin gaar ah , Nuqul ka mid ah wuxuu u gudbinayaa golaha nootaayooyinka .

**Qod 75aad**

Kaydiyaha Wuxuu sameynayaa hubinta qoraalka ku kaydsan diiwaanka nootaayaha Gobolka .
Soo saarida nuqul, xataa qaabka fulinta , Nuxurka iyo Cadeyta.

Kaydiyaha wuxuu kaloo qabankaraa soo celinta dukumiintiyada furitaanka iyo faafinta dardaaranka ku kaydsan Diiwaanka isagoo Raacaya shuruudaha ku saabsan mowduuca .
Qodobada la xiriira qaabka qoraalka nootaayaha waa in ay fiiriyaan kaydiyaha Habka gudashada howlaha nootaayaha .
Fulinta hawsha nootaayaha wuxuu hoos imaanayaa kaydiyaha sida la xisaabtanka waajib gudasho la'aanta nootaayooyinka nusqaaminta xushmadda iyo xuquuqaha kale ee dheeraadka ah .

**Qod 76aad**

Diiwaan nootaayo goboleed kasta wuxuu yeelanayaa labo  Xaraf oo leh kala horaynta  xuruufaha shibanayaasha, Mid waxaa iskaleh nootaayaha kuna tilmaaman haybta nootaayooyinka keydiyey qoraalada , taariikhda u horeeysa  iyo midka ugu dameysay ee qoraalka , Waxaa kaloo lagu cadeynayaa haybta dhinacyada ay khuseyso qoraalka , marka hore waa in si taxan loo tilmaamaa qoraalka ilaalinta nootaayo kasta , mida labaa waxay ahaanaysaa mida lagu sheego nooca iyo tariikhda qoraalka iyo magaca nootaayaha  qoray .

**Cinwaanka 6aad**
**(kormeerka nootaayaha iyo diiwaanka , hubinta qobobada ciqaabeed iyo habraaca dabaqada lamidka ah)**
**Cutubka 1aad**
**( Koarmeerka iyo hubinta )**

**Qod 77aad**

Wasiirka Garsoorka wuxuu leeyahay istimaalka awooda sare ee kormeer ee nootaayooyinka iyo diiwaanka nootaayooyinka gobolka iyo kormeerida waqtiga ku haboon .
Isla kormeer kaa lamid ah waxaa sameyn kara golaha nootaayooyink a iyo xeer ilaaliyaha guud ee qaranka .

**Qod 78aad**

Hubinta lagu sheegay qod kore waxaa sameynkara  gudoomiyaha golaha nootaayooyinka ama cida uu wakiikho .
Hubinta waxaa laga sameynayaa qoraal taaoo noqulka mid ah isla markiiba loo gudbinaya wasiirka garsoorka .

**Cinwaanka 2aad**
**( Qodobada Ciqaabeed )**
**Qod 79aad**

Qodobada Ciqaabee Ee nootaayooyinka gabay waajibaadkooda shaqo waa :

1) Digniin
2) Cabasho
3) Ganaax
4) Laalid
5) Casilaad

Qodobadan waxaa loo dabaqayaa si madax banaa gaar ahaan kuwa sharcigu soo rogay xitaa hadii uu ka dhalanayo baabi'in ta qoraalka .

**Qod 80aad .**

Amarka ka kooban canaanta nootaayaha ku wareejin dhaawac leh si aan markale u dhicin.

Faafreebka cadeynta kusoo baxa qaab  dhaliilan ee wareejin la'aanta , iyo nuqul la xiriira talaabo ka baaqasho ogaysiin 15 maalin gudohood lagusoo xareeyo diiwaanka naataayana gobolka .

Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan min sh.som.40 ilaa sh.som.200 Nootayaha jabiya axkaamta ku xusan Nambarada 1,2,3,4,5 ,7 iyo 9 Ee qodobada 44aad iyo 46, 57,63, 65 iyo  kaydinta qoraalada iyo ku xadgudubka muga tirsiga ee axkaamta ku xusan qod 52aad iyo 55aad .

Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan min sh.som.200 ilaa sh.som.500 Nootaayaha ku xadgudba axkaamta ku xusan Qod 22aad No.kala ah 1,8,10,11iyo 12 Ee Qod.44aad iyo bilowga faqrada Qod 6aad .

Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed ee gaaraysa min sh.som .500 ilaa iyo 1000 Nootaayaha marka laga laalay ama laga joojiyey soo saarista nuqulka , cadeynta ama nuxurka .

**Qod 81aad**

Waxaa lagu ciqaabayaa in laga laalo hal bil ilaa lix  bilood nootaayaha:

1) Horay ugu xadgubay qodobka  22aad .
2) Ku xadgudubka axkaamta ku qoran qodobka 47aad 48aad 49aad .
3) Taxadar la'aan ku kaydin waayay qoraal lasoo gaarsiiyey ee agtiisa lagu keydiyey .

**<u>Qod . 71aad</u>**

Xalalka  Golaha Nootaayooyinka Waxay Ku Gaaraan  Aqlabiyadda codka .

Xoghayaha waa in uu ururiyaa qoraalada kulamada , waana in uu xanaaneeyaa dhamaan warqadaha la xiriira mowduuca ,Guddoomiyaha galaha ayaa awood u leh in uu saaro nuqul qoraalada kulamada waxaa saxiixaya Gudoomiyaha iyo Xoghayaha .

**Qod 72aad**

Golaha Nootaayooyinka hawlahaas ka sokow , Waxay kaloo awood  u leeyihiin hab raac anshax marinta howlaha Nootaayooyinka .

Goluhu wuxuu awood u leeyahay in ay dabaqaan Qodobada ilaalinta faafreebka iyo Tacsiirka .

**Cinwaanka 5aad**

**(Diiwaanka Nootaayaha Ee Gobolka )**

**Qod:  73aad**

**Maxkamadda Rafcaanak Gobolka Waxaa lagu kaydinayaa laguna xanaanaynayaa :**

4) Qoraalada iyo diiwaanada nootaayooyinka geeriyooday  qayb ahaan ama kuwa si joogto ah ama si kumeel gaar ah looga fariisiyey hawsha nootaayaha ama u wareejiyey xaruntiisa Gobol.
5) Nuqulada laga baabi’iyey diiwaanka sida uu sheegayo.
6) Telagaraamyada la helay ama qoraalka laga sameeyey Telfoonada lasoo diray sid u sheegayo.

**Qod 64aad .**

Keydiyaha wuxuu masuul ka yahay Xanaaneynta iyo keydinta dhamaan dukumiintiyada lagu keeydiyey diiwaanka waa in uu si hagaagsan u ilaaliyaa dhab u gudashada masuuliyada nootaayooyinka ka saran diiwaanka iyo in ay cadeeyaan golaha nootaayooyinka Jebinta goboladooda Nootaayayaasha Marlabaad.

**Qod 75aad**

Marka ay socoto kaydinta qoraalka asalka iyo diiwaanka kaydiyaha isla markiiba waxay Bilaabayaa diriraanka iyo xaqiijin hawshaas iyada ah , kaydiyaha wuxuu diyaarinayaa warbixin gaar ah , Nuqul ka mid ah wuxuu u gudbinayaa golaha nootaayooyinka .

**Qod 76aad**

Kaydiyaha Wuxuu sameynayaa hubinta qoraalka ku kaydsan diiwaanka nootaayaha Gobolka .
Soo saarida nuqul, xataa qaabka fulinta , Nuxurka iyo Cadeyta.
Kaydiyaha wuxuu kaloo qabankaraa soo celinta dukumiintiyada furitaanka iyo faafinta dardaaranka ku kaydsan Diiwaanka isagoo Raacaya shuruudaha ku saabsan mowduuca .
Qodobada la xiriira qaabka qoraalka nootaayaha waa in ay fiiriyaan kaydiyaha Habka gudashada howlaha nootaayaha .
Fulinta hawsha nootaayaha wuxuu hoos imaanayaa kaydiyaha sida la xisaabtanka waajib gudasho la'aanta nootaayooyinka nusqaaminta xushmadda iyo xuquuqaha kale ee dheeraadka ah .

**Qod 77aad**

Diiwaan nootaayo goboleed kasta wuxuu yeelanayaa labo Xaraf oo leh kala horaynta xuruufaha shibanayaasha, Mid waxaa iskaleh nootaayaha kuna tilmaaman haybta nootaayooyinka keydiyey qoraalada , taariikhda u horeeysa iyo midka ugu dameysay ee qoraalka , Waxaa kaloo lagu cadeynayaa haybta dhinacyada ay khuseyso qoraalka , marka hore waa in si taxan loo tilmaamaa qoraalka ilaalinta nootaayo kasta , mida labaa waxay ahaanaysaa mida lagu sheego nooca iyo tariikhda qoraalka iyo magaca nootaayaha qoray .

**Cinwaanka 6aad**
**(kormeerka nootaayaha iyo diiwaanka , hubinta qobobada ciqaabeed iyo habraaca dabaqada lamidka ah)**
**Cutubka 1aad**
**( Koarmeerka iyo hubinta )**

**Qod 78aad**

Wasiirka Garsoorka wuxuu leeyahay istimaalka awooda sare ee kormeer ee nootaayooyinka iyo diiwaanka nootaayooyinka gobolka iyo kormeerida waqtiga ku haboon .
Isla kormeer kaa lamid ah waxaa sameyn kara golaha nootaayooyink a iyo xeer ilaaliyaha guud ee qaranka .

**Qod 79aad**

Hubinta lagu sheegay qod kore waxaa sameynkara gudoomiyaha golaha nootaayooyinka ama cida uu wakiikho .
Hubinta waxaa laga sameynayaa qoraal taaoo noqulka mid ah isla markiiba loo gudbinaya wasiirka garsoorka .

**Cinwaanka 2aad**

**( Qodobada Ciqaabeed )**

**Qod 80aad**

Qodobada Ciqaabee Ee nootaayooyinka gabay waajibaadkooda shaqo waa :

6) Digniin
7) Cabasho
8) Ganaax
9) Laalid
10) Casilaad

Qodobadan waxaa loo dabaqayaa si madax banaa gaar ahaan kuwa sharcigu soo rogay xitaa hadii uu ka dhalanayo baabi'in ta qoraalka .

**Qod 81aad .**

Amarka ka kooban canaanta nootaayaha ku wareejin dhaawac leh si aan markale u dhicin.
Faafreebka cadeynta kusoo baxa qaab dhaliilan ee wareejin la'aanta , iyo nuqul la xiriira talaabo ka baaqasho ogaysiin 15 maalin gudohood lagusoo xareeyo diiwaanka naataayana gobolka .
Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan min sh.som.40 ilaa sh.som.200 Nootayaha jabiya axkaamta ku xusan Nambarada 1,2,3,4,5 ,7 iyo 9 Ee qodobada 44aad iyo 46, 57,63, 65 iyo kaydinta qoraalada iyo ku xadgudubka muga tirsiga ee axkaamta ku xusan qod 52aad iyo 55aad .
Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax dhan min sh.som.200 ilaa sh.som.500 Nootaayaha ku xadgudba axkaamta ku xusan Qod 22aad No.kala ah 1,8,10,11iyo 12 Ee Qod.44aad iyo bilowga faqrada Qod 6aad .

Waxaa lagu ciqaabayaa ganaax lacageed ee gaaraysa min sh.som .500 ilaa iyo 1000 Nootaayaha marka laga laalay ama laga joojiyey soo saarista nuqulka , cadeynta ama nuxurka .

**Qod 82aad**

Waxaa lagu ciqaabayaa in laga laalo hal bil ilaa lix  bilood nootaayaha:

4) Horay ugu xadgubay qodobka  22aad .
5) Ku xadgudubka axkaamta ku qoran qodobka 47aad 48aad 49aad .
6) Taxadar la'aan ku kaydin waayay qoraal lasoo gaarsiiyey ee agtiisa lagu keydiyey .
7) Mar labaad ku xadgudub xaalad uu sheegayo Lambarada 1,8,10,11iyo 12 Ee Qod 44aad .
8) Ka horyimaada hubinta lagu sheegay qod 79aad kasoo horjeedkeed  wax aan suura gal ahayn .

Waxaa lgu ciqaabayaa in la laalo lix bilood ilaa hal sano nootaayaha ku xadgudba axkaamka faqrada 1aad Ee Qod 24aad iyo Qod 25aad , 40aad , 41aad ,  42aad . Laalitaanka wuxuu ka dhalanayaa dhicitaanka uusoo saaro xubin tayaleh oo ka tirsan golaha nootaayooyinka .

**Qod 83aad**

Karti darada qaanuuneed ee hawl gudashao la'aanta naataayaha lid keed waxaa lagasoo saarayaa amar xiritaan ama amar xabisaad .

Waxay kaloo noqon kartaa ku dhawaaqida howl gudasho la'aanta nootaayada kasoo keeni karta in uu ka dhasho fal ciqaabeed ee dambiyada uu tilmaamayo faqrada ugu dameysay ee Qod 86aad .

Awooda garsoor ee falkaas ku qaadi karta nootaayaha waxay ku wargalinayaan golaha nootaayooyinka khasaaraha nootaayaha ee dambigu ka dhashay.

**Qod 84aad**

Waxaa lagu ciqaabayaa casilaad nootaayaha:

1) Hawsha iska wata marka la laalay ama karti daro looga fariisiyey howsha , waxaa ka reeban axkaamta farqrada ugu dameysa Qod 83aad.
2) Uu ka basho goobtiisa shaqo , ka reebtoon cudur faafa ama cudur lakala qaado darted.
3) Hadii uu si ula ka aanu u xafidin diiwaanka iyo qoraalka lasoo gaarsiiyey in uu keydiyo awgeed.

Hadii uu soo gaaro xukun xatooyo xoola dadweyne , laaluush waydiisasho , laaluush qaadasho , been abuur , xatooyo ,dhagar , qaan , gudasho, ama go,aanada gaarka ee awooda Booliska.

**Qod.85aad**

Marka laga reebo axkaam kala gedisan , ee nootaayaha daba qaayo marka la fiiriyo diiwaanka kale ee sharciga faraayo heynteeda , sidoo kale ciqaabta lagu digaayo muga qaabdarada iyo tiris la,aanta .

## Qod.86aad

Hadii nootaayaha uu noqdo mid lagu soo eedeeyey ka qeyb qaadasho sifaalaha dibga fududeeya laalitaanka iyo ku dhawaaqida ciqaabta waxay ahaan kartaa mid laga qafiifiyo ugu yaraan
Ilaa iyo nus. Wuxuuna noqon karaa mid loogu bedelo laalitaan iyo digniin .

## Qod.87aad

Ku noq noqoshada mar kasta ah. xad gudubka cusub wuxuu u noqon doonaa ciqaab shan sanadood ah ee xukunkii horre .

## Qod.88aad

Talaabada ciqaabeed ee lidka ku ah Nootaayooyinka , qalad ku wareejintooda wuxuu noqon doonaa sedex sanadood laga bilaabo maalinta xadgudubka , iyadoo ay jirto talabooyin la qaadayo .

## Qod.89aad

Nootaayaha qaab kasta oo sharaf daro eek u timaada asluubtiisa gaarka ah iyo midka guud ,sharaftiisa, sumcadiisa,xushmadiisa iyo haybada dabaqada nootaayooyinka,ama naaqus xushmadda iyo xuquuqda dheeraadka u sameyn saaxiibadiisa tartan sharci daro ah,waxaa lagu ciqaabayaa edbin iyo laalitaan ila hal sano ah,haddii xaalada aad u Qatar tahay waxay keenaysaa casilaad,casilaada wuxuu mar kasta ahaanayaa mid lagu dabaqa nootaayaha, marka uu noqdo mid lagu xukumay laalitaan laba jeer ku xad gudub axkaamta ku xusan qodobkan, ku xadgudub hor leh.

## Cinwaanka 3aad

## (hab  ciqaabeed)

### Qod.90aad

Gudoomiyaha golaha nootaayooyinka waxaa soo gaaray akhbaar sheegaya ku lug lahaansho nootaanyo fal dabaqaada ciqaabta nidaamisa iyadoo ka horeysa xaqiijinta lagama maarmaanka ah ee nootaanyaha khuseeya in loo soo gudbiyo golaha nootaayooyinka kaa soo go`aan ka gaaraya in la raaco hab ciqaabeedka nootaayaha .

Sidey noqotaba golaha waxay cayimayaan in tilaabo la qaado,gudoomiyaha wuxuu siinayaa warqad ogaysiin oo dag dag ah nootaayaha kana kooban arimahaas.

Muddo 20 maalmood gudohoood laga bilaabo maalinta la gaarsiiyay warqadda ee ku xusan faqrada kore,nootaayaha wuxuu ku keeni karaa cadeemihiisa waxa uu ka qabo arinta si qoraal ah.

Waqtiga kor ku xusan waa in lagu dhameystiraa wax yaabaha loo baahan yahay iyo baaritaanka loo baahan yahay in ay golaha ka dhagaystaan nootaayaha,haddii codsi uu soo sameeyay.

### Qod.91aad

Golaha nootaayooyinka kama saamixi karo nootaayaha la soo eedeeyay in uu saaro ciqaabta uu u arkaayo munaasabka haddii ay awoodiisu tahay,haddii kale wuxuu u gudbinayaa wasiirka garsoorka.

Haddii ciqaabta uu saarayo u arko in ay awoodiisa tahay golaha nootaayooyinka uma gudbinaayo wasiirka garsoorka wax sababayn  ah, waxaa si ku meel gaar ah loogu gudbinayaa dhamaan nuqulada la xiriira hab raaca ciqaabta.

Wasiirka wuxuu dib u eegis ku samayn karaa go`aanka isagoo aan ku koobnaanayn soo jeedinta golaha haddii ay ku saabsantay qadarka iyo tirade ciqaabta. Nuqul go`aanka wasiirka waxaa loo gudbinayaa nootaayaha iyo golaha nootaayooyinka.

## Cinwaanka toddobaat

## (Qodobo kala duwan iyo gaba gabo)

## Qof.92aad

Go`aanada maamul iyo midka ciqaabeed ee ku saabsan go`aanka kama dambaysta ah nootaayaha wuxuu racfaan u qaadan karaa maxkamadda sare wixii sharciga waafaqsan, muddo 30 maalmood gudohood ah marka go`aanka la soo gaarsiiyay.

## Qod.93aad

Diiwaanka nootaayaha ee sheegaya qodobka 110 ee nadaamka garsoorka ee haatan jira waa la baabi`iyay.

Keydiyaha diiwaanka qoraalada lagu wareejiyay iyo waraaqaha waa in lagu keydiyaa diiwaanka Nootaayaha Gobolka Banaadir 31/December 1962

Waxay ku dhamestirmeysaa dhamaan axkaamta ka hor imaanaya qodobkan , ama ahaanaya mid lama qaataan ah .

## Qod.94aad

Qarashka la xariira howsha Golaha Nootaayooyinka ee keydka Nootaayaha Gobolka waxay fuuleysaa  Wasaarada  Garsoorka .

## Qod.95aad

Xeer nidaaminta ku saabsan Nootaayaha keydka Nootaayooyinka waxaa awood u leh oo kaliya

Wasiirka Garsoorka.

## Qod.96aad

Qodobadaan waxay ka dhaqan galayaa dhamaan dhulka dowlada 15 maalmood gudahood ku shaacinteeda faafinta rasmi ah ee dowlada .

**Muqdisho,02/maarso/1962**

**Adan cabdalla cismaan**

**Wasiirka koowaad**

**Cabdirashiid cali sharmarke**

**Wasiirka Garsoorka**

**Maxamuud axmed maxamed**

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 42 ee 16 Maajo 1981

Wax ka beddelid Tacariifadda Ujuuradaha Nootaayayaasha, ee ku lifaaqan Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee 3da Abriil 1972, Lamb. 99.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qad. 82, lamb. 14 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee 3dii Abriil 1972, lamb. 99;

ISAGOO AQOOSADAY: In loo baahan yahay in wax laga beddelo tacariifadda ujuuradaha ee Nootaayayaasha;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, iyo talada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aanka Golaha Wasiirrada.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

1) Ujuuradaha ku kala xusan qodobbada 2 iyo 4 ee tacariifadda ujuuradaha ku lifaaqan Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee 3dii Abriil 1972, lamb. 99, waxaa lagu beddelay sida soo socota:-

1) Qod. 2: Ujuuradaha ku xusan qod. 1 ee koreeya waxaa laga dhigay sida soo socota:-

a) Wakaalad Guud . . . . .Shs. 120,00/=

b) Wakaalad khaas ah . . . . » 80,00/=

t) Qoraal ku saabsan dhigaal dokumeento . . . . . . . » 90,00/=

j) Qoraal ku saabsan dhigaal dardaaran qarsoodi ah (testamento segreto) . . . . . . . . » 150,00/=

x) Qoraal ku saabsan dhigaal dar daaran, markii dardaaranka la dhigayo uu yahay mid uu dardaarmuhu gacantiisa ku qoray (testamento olografo) . . . . . . » 50,00/=

2) Qod. 4: Qoraallada iyo heshiisyada ku saabsan kala wareegidda hanti ma-guurto, qiimaha hantida la heshiisyada Shirkadeed oo cayn kasta ah iyo wada lahaansho hantiyeed, qiimaha hantida lagu shirkoobayo ama la wada yeelanayo;
isku darid, qiimaha guud ee hantida iyo kaydka shirkadaha la isku darayo; haddii shirkadaha la isku darayo middoodii ay midda kale la midoobayso kana noqonayso, hantida iyo kaydka guud ee shirkadda oo midda kale la midoobayso; qoraallada shirarka shirkadaha ku saabsan hanti kordhin ama soo saarid qiraallo deyn shirkadèed (obbligazione), qiimaha hantidii hore lagu soo kordhinayo, ama qiimaha guud ee Qoraallada ku saabsan hanti kala qaybsasho, qiimaha guud ee hantida la qaybsanoyo; qoraallada ku saabsan xuquuq ama hanti is-dhaafin ama isugu beddelid (transazione), qoraallada ku saabsan dhisid xuquuq la xiriira intifaaca, isticmaalidda iyo mididiinnimo dhuleed (servitù prediali), raxan, alaab isku beddelid (permuta); xaraash maxkamadeed, enfiteeusi, iyo qoraallada kale ee ku saabsan xuquuqda ee lahaanshada (diritti possessori) ama dhammaanad, waxaa looga qaadayaa ujuuradaha soo socota:-

| | | |
|---|---|---|
| a) | Qiimo ilaa Shs. 10.000, . . . . . . | 6% |
| b) | laga billaabo Shs. 10.001 ilaa Shs. 25.000 | 3,50% |
| t) | laga billaabo Shs. 10.000 ilaa Shs. 50.000 | 3% |
| j) | Laga billaabo Shs. 50.001 ilaaShs. 100.000, | 1,50% |
| x) | » » » 100.000, » » 500.000, | 1% |
| kh) | Inta dhaafsan Shs. 500.000 . . . . . | 0,30% |

Sharci lambar 7, taariikh 2 Feb. 1986: Dib u habeynta Mihnadda Notaayada.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Mihnadda Notaayada waxaa lagu dhaqayaa Sharciga lambar 8 ee 15-2.1961 iyo Xeerka-tashriiciga lambar 1 ee 2-3.1962.

Qod. 2aad

Iyagoo Sharciyada kor ku tilmaaman ay sidooda u taagnaanayaan, Madaxweynaha JDS, dhegeysiga soo-jeedinta Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta kaddib, wuxuu Notaayo u magacaabi karaa, imtixaan la'-aan, qof xagga aqoonta gaarka ah ee mihnadda Notaayenimada, khibradda iyo waayo arganimada uu leeyahay dartood loo gartay inuu mudan yahay xilkaas ina uu qabto.

Qod. 3aad

1. Sharciyaqaannada ka tirsan Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta ee dhaqangalka Sharcigan ka hor hayey xil Notaayo, waxaa u furan in ay shaqada notaayenimada sii wataan iyagoo tan Dawladda istiqaalo ka keenaya ama ay ku laabtaan Wasaaraddooda

2. Kala doorashada labada fursadood waa in ay ku dhacdaa muddo lixdan maalmood gudahood ah, laga billaabo maalinta Sharcigani uu dhaqan galo.

Qod. 4aad

Khidmadda Notaayuhu uu ku qaadanayo hawlaha uu qabto waxaa lagu xaddidayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soojeedinta Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta

Qod. 5aad

Waxaa la baabi'iyey Sharci iyo Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 6aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 2 Feb. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 8, taariikh 3 Feb. 1986: Ansixin Sharciyada la soo saaray 1-7.1985 ilaa 2.1.1986;

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA : Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la ansixiyay Sharciyada soo socda:-

1. Sharci lam. 18 ee 31 Luulyo 1985: «Oggolaansho Afrikaanka ee xuquuqda Aadamiga iyo Dadyowga»;
2. Sharci lam. 19 ee 30-9.1985: «Dhismaha Mashruuca Horumarinta Bombelmada»;
3. Sharci lam. 20 ee 30.9.1985: «Is-beddelka 1aad ee Miisaaniyadda 1985»;
4. Sharci lam. 21 ee 30.[illegible]1985: «U rogid Sharci Xeer-Sharci lam. 4 ee 15.8.85, Wax ka beddelidda Sharciga Nidaamka Dhismaha Dawladda»;
5. Sharci lam. 22 ee 2.11.1985: «Dhismaha Rugta Ganacsiga»;
6. Sharci lam. 23 ee 3-11.1985: Sharciga Kalluumeysiga Soomaaliyeed»;
7. Sharci lam. 24 ee 24.12.1985: «Oggolaansho Heshiiska fududeynta iyo horumarinta is-dhaafsiga Ganacsiga ee ka dhexeeya Dowladaha Carbeed»;

Qod. 2aad

Ansixintan waxay dhaqan geleysaa laga billaabo 3-1.1986, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3 Feb. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Xafiiska Guddoomiyaha**

**الجمهورية الفيدرالية الصومالية**
**مجلس الشعب**
**مكتب الرئيس**

**Somali Federal Republic**
**The House of the People**
**Office of the Speaker**

**Ref:** GSH/318/2/B-10/20 :الرقم

**Mogadishu,** December 29, 2020 التاريخ

**Ku:** **Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Muqdisho.**

---

**Ujeeddo:** **Ansaxin Hindisa Sharciyeedka Nootaayooyinka.**

Mudane Madaxweyne,

Sida aad la socoto, Hindisa Sharciyeedka Nootaayooyinka ee halkaan ku lifaaqan waxa soo gudbisay Wasaarada Cadaaladda XFS.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talogaly marsiiyay Guddiga Garsoorka Awqaafta iyo Arrimaha Diinta ee Golaha Shacaka. Ugu dambayna Hindisa Sharciyeedka Nootaayooyinka ayaa Golaha Shacabku ansixiyey Kalfadhiga 8aad Kulankiisa 9aad ee 29/12/2020, iyadoo ay goobjoog yihiin (145) kuna ansixyey 145 (Boqol Afartan iyo Shan) xildhibaan oo oggol ah, ma jirin xildhibaan diiday ama ka aamusay:

M.ne Madaxweyne, madam oo Aqalkii Sare Doorasho ku maqanyahay, waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (q) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kaaga codsanayaa inaad go,aanka Golaha ku ogolaato xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

Naga guddoon salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

**M.ne Mahad Cabdala Cawad**
**Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

**Og:** **R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya**
**Muqdisho.**

---

**Og:** **Guddiga Garsoorka Awqaafta iyo Arrimaha Diinta ee Golaha Shacaka.**

---

**Og:** **Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka**
**L/H. Golaha Shacabka**

---

**Tell:** +252612224442 /+252-615577472

**E-mail:** speaker@parliament.gov.so **Website:** www.parliament.gov.so

**ANSAXINTA HINDISA SHARCIYEEDKA NOOTAAYOOYINKA.**

| Kusimaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye ku-xigeenka 2aad-Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 145: Oggol: 145; Diiday: 0; Aamustay: 0; | |
| Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: December 29, 2020 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Shaqo ku maqa | |
| Saxiix: M.ne Abdiweli Sh. Ibrahim Muudey | Taariikh: December 29, 2020 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux | Taariikh: December 29, 2020 |

# JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA NOOTAAYADA DADWEYNAHA EE FEDERAALKA

**Tusmo:**


CUTUBKA KOOWAAD: QODOBBO GUUD .......... 1

Qodobka 1aad: Magaca Xeerka .......... 1

Qodobka 2aad: Ujeeddada Xeerka .......... 1

Qodobka 3aad: Qeexid .......... 1

CUTUBKA LABAAD: NOOTAAYADA .......... 2

Qodobka 4aad: Hawlaha Notaayada .......... 2

Qodobka 5aad: Hawlaha ka Reebban Nootaayaha Dadweynaha .......... 3

Qodobka 6aad: Waxyaabaha Sharci ahaan loo ogolyahayin uu qabto Nootaayaha Dadweynaha .......... 3

Qodobka 7aad: Noocyada Rukhsadda .......... 3

Qodobka 8aad: Shaabbada Nootaayada Dadweyne .......... 3

Qodobka 9aad: Furidda Xafiis Nootaayo .......... 4

Qodobka 10aad: Guuridda Nootaayo .......... 4

Qodobka 11aad: Magacaabidda Nootaayada .......... 4

Qodobka 12aad: Sababaha Waayidda Rukhsadda Nootaayaha .......... 4

Qodobka 13aad: Shuruudaha Codsadaha Notaayada .......... 5

Qodobka 14aad: Hab-raaca Diiwaan-gelinta Nootaayada .......... 5

Qodobka 15aad: Hab-raaca Rukhsad- bixinta Nootaayada .......... 5

Qodobka 16aada: Dhaarta Nootaayaha .......... 6

Qodobka 17aad: Tababarka Nootaayaha .......... 6

Qodobka 18aad: Qaabka Qoraallada Nootaayada .......... 7

Qodobka 19aad: Fal-dembiyeedyada ka Dhasha Qoraallada .......... 8

Qodobka 20aad: Xurmeynta Nootaahaya .......... 8

Qodobka 21aad: Xaddidaadda Shaqada Nootaayaha .......... 9

Qodobka 22aad: Xushmada Nootaayada .......... 9

Qodobka 23aad: Xirfadda Nootaayaha ........ 10

Qodobka 24aad: Nootaayo Caalami ah ........ 10

CUTUBKA SADDEXAAD: HAWLAHA GUDDIGA ........ 10

Qodobka 25aad: Guddiga Rukhsad-bixinta Nootaayada ........ 10

Qodobka 26aad: Waajibaadka Guddiga Rukhsad-bixinta ........ 11

Qodobka 27aad: Muddada Xil-haynta Guddiga ........ 11

Qodobka 28aad: Hab-raaca Imtixaanka Qiimeynta Nootaayada ........ 11

Qodobka 29aad: Imtixaan-ka-dhaafid ........ 13

Qodobka 30aad: Hab-raacyada Dacwadaha Anshax-marinta ........ 13

Qodobka 31aad: Go'aannada Anshax-marinta Nootaayooyinka ........ 13

Qodobka 32aad: Cabasho iyo Racfaan ka Qaadasho ........ 14

CUTUBKA AFARAAD: GOLAHA MIDEYSAN EE NOOTAAYOOYINKA ........ 14

Qodobka 33aad: Qaab-dhismeedka Golaha Mideynta Nootaayooyinka ........ 14

Qodobka 34aad: Awoodda Golaha ........ 14

Qodobka 35aad: Hawlaha Golaha ........ 14

Qodobka 36aad: Xarunta Golaha ........ 15

Qodobka 37aad: Muddada Xil- Haynta Golaha ........ 15

Qodobka 38aad: Baabi'in ........ 15

Qodobka 39aad: Dhaqangal ........ 15

# CUTUBKA KOOWAAD:
# QODOBBO GUUD

## Qodobka 1aad:
## Magaca Xeerka

1) Xeerkan waxa lagu magacaabo Xeerka Nootaayada Dadweynaha ee Federaalka.
2) Xeerkan wuxuu ku saleysan yahay Raadraac iyo wax-ka-beddel lagu Sameeyay sharciyadii horeNootaayada Soomaaliya sida: Sharci Lr.8 ee 15/02/1961, Dekreeto Sharci 02/03/1962, Sharci Lr.7 ee 02/02/1986 iyo Dekreeto Sharci Lr.3 ee 15/06/1987.

## Qodobka 2aad:
## Ujeeddada Xeerka

Ujeedooyinka laga leeyahay Xeerkan waxaa ka mid ah:

1) Sharciyeynta qaab-dhismeedka mihnadda Nootaayada Dadweynaha ee Federaalka, hubinta sarreynta sharciga iyo xoojinta cadaaladda, difaaca xuquuqda dadweynaha iyo xorriyadooda sida ku cad Qodobka 34aad (2) (a) ee Dastuurka KMG ah ee JFS. Wuxuuna nidaaminayaa qaabka Rukhsad-bixinta, hab- raacyada Imtixaan ka qaadista, Diiwaan-gelinta Nootaayooyinka, Anshax-marinta iyo Rukhsad-kala noqoshada, iyadoo saldhig looga dhigayo shuruucda dalka si kor loogu qaado hufnaanta hawlaha Nootaayada.
2) Xeerkani wuxuu abuurayaa hannaanka wada-shaqeynta Nootaayooyinka iyo in dib-u-habeyn lagu sameeyo Golaha Nootaayooyinka Dalka
3) Xeerkani wuxuu kale oo qeexayaa awoodaha Dawlad-goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka (DXF) ay leeyihiin in ay yeeshaan Notaayo u gaar ah oo kashaqeysa dhulka ay maamusho Dawlad-goboleed kasta oo ka tirsan JFS waxayna sameynaysaa Dawlad-goboleed kasta Golaha mideynta Nootaayadda oo Heer Dawlad-goboleed ah.

## Qodobka 3aad:
## Qeexid

Haddii an si kale loogu macneyn Xeerkan dhexdiisa, ereyada soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa qeexidda ku hor qoran:

1) **Nootaayaha:** waxaa loola jeedaaS arkaal Guud oo loo sameeyay inuu qoraal ka soo saaro hawlaha dhex mara dadka nool iyo rabitaanka dadka dardaarmaya inta aysan dhiman, Dawladduna ku aamintay inuu qoraalladaas ka run sheego rasmi ahaantooda, kaddibna ka soo saaro nuqullo iyo dokumentiyo xeerkawaafaqsan.
2) **Wasiir:** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda ee Heer Federaal ama Wasiirka Cadaaladda ee DXF.
3) **Diiwaanka:** Waxaa loola jeedaa Diiwaanka Guud ee lagu keydiyo arrimaha khuseeyo Nootaayooyinka Dalka.
4) **Agaasime:** Waxaa loola jeedaa Agaasimaha Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda ee heer Federaal ama DXF.
5) **Diiwaan-haye:**WaxaaloolajeedaaMadaxa Xirfadleyda ee Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda ee Heer Federaal ama DXF.
6) **Shahaado Sharci:** Waxaa loola jeedaa Shahaado Shareecada iyo Qaanuunka ah ama midkood ee ay bixisay Jaamacad sharci oo Dalka laga aqoonsanyahay;
7) **Rukhsad:** waxaa loola jeedaa aqoonsiga ama oggolaashaha Nootaayo Dadweyne ay ku hawl-gasho;
8) **Golaha Nootaayada:** Waxaa loola jeedaa Golaha Mideynta ee Nootaayooyinka Heer

Federaal ama Heer DXF;

9) **Guddiga Rukhsad-Bixinta:** Waxaa loola jeedaa:
   a. Guddi Heer Federaal ah oo ka kooban xubno ka kala socda: Maxkamadda Sare ee Federaal, Wasaarad Cadaaladda Federaalka iyo Golaha Mideysan ee Nootaayooyinka Federaalka ama
   b. Guddii Heer Dawlad-goboleedka, Wasaaradda Cadaaladda Dawlad-Goboleedka iyo Xubno ka tirsan Guddiga Mideysan ee Nootaayooyinka ee Dawlad-goboleedka;

10) **Guddiga Anshaxa:** Waxaa loola jeedaaGuddiga Rukhsad-bixinta Nootaayo Dadweyne ee sare ku qeexan:

11) **Guddiga Imtixaanka Qiimeynta Nootaayada:**Waxaa loola jeedaa Guddi ka kooban Garsoore Maxkamadda Sare ee Federaalka ama Maxkamadda Sare DXF,Madaxa Xirfadleyda Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda Federaalka ama DXF iyo Bare Sharci-yaqaan ah oo ka tirsan Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ama Jaamacadaha kale ee Sharciga bixiya ee la aqoonsanyahay;

12) **Khidmad:** Waxaa loola jeedaa kharashyada laga qaadayo Nootaayo Dadweyne sida: diiwaan-gelinta, imtixaanka iyo cusboonaysiinta Rukhsada sanadlahaah;

13) **Ganaax:** Waxaa loola jeedaa qiimo lacageed oo lagu xukumo ama la saaro Nootaayo Dadweyne oo fal anshax-xumo geysta.

14) **Hakin:** Waxaa loola jeedaashaqo-ka- joojin lagu sameeyo Nootaayo Dadweyne oo muddo kooban ah;

15) **Laalis:** Waxaa loola jeedaa in rasmi ahaan lagala noqdo ama laga tirtiro Rukhsadda Nootaayo Dadweyne:

16) **XCS:** waxaa loola jeeda Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed;

17) **DXF waxaa** loola jeedaa Dawladaha- goboleed xubin ka ahFederaalka

18) **JFS**. Waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## CUTUBKA LABAAD:
## NOOTAAYADA
### Qodobka 4aad:
### Hawlaha Notaayada

Nootaayuhu waa Sarkaal Dawladeed oo loo sameeyay inuu qoraal ka soo saaro hawlaha dhex mara dadka nool iyo rabitaanka dadka dardaarmaya inta aysan dhiman, Dawladduna ku aamintay inuu qoraalladaas ka run sheego rasmi ahaantooda, kaddibna ka soo saaro nuqullo iyo dokumentiyo xeerkawaafaqsan. Hawlihiisa waxaa kamid ah:

1) Hubinta Dokumentiyada la xiriira rabitaannada qaanuuneed ee xaaladaha gaarka ah ee dhinacyada heshiis dhex-marayo, kaddibna uu saxiixo;
2) Keydinta qoraallada asalka ah, nuqullada iyo dokumentiyada gaarka ah, ha ahaadeen kuwo lagu soo qoray dibadda ama gudaha dalka;
3) Saxiixidda iyo xoojinta diiwaannada ganacsiga sida ay tilmaamayaan qodobbada gaarka ah ee sharuucda dalka oo la xiriira arrimahaas;
4) Qorista qoraallada qaanuuneed iyo turjumidda qoraallada, iyadoo lala kaashanayo, haddii loo baahdo xeel-dheereyaal aqoon gaar ah u leharrimahaas.
5) Caddeynta qoraallada ama dokumintiyada diiwaanka Guud ee Nootaayada Dadweynaha;
6) Kala-wareejinta hantida guurtada ama ma-guurtada ah oo lagu caddeyo dokumentiyo sax ah;

7) U gudbinta Wasaarada Cadaaldda labada Heer warbixin sanadeed iyo xilli kasta oo looga baahdo qoraalsababeysan;
8) Nootaayada Dadweyne ma qaban karto qoraal uu dhinac ka yahay qof aan jirin ama aan la hayn qaabka sharcigu tilmaamayo ilaa laga helo qof jira ama wakiilladiisa qaanuuniga ah;
9) Talo bixin sharci oo uu siinayo dadka soo codsada arrimaha ku aaddan heshiisyada, ganacsiga, dacwadaha Madaniga amaciqaabta ee ka dhallan kara heshiisyada dhinacyada dhexdooda.
10) Nootaayaha Dadweynuhu wuxuu wakiil uga yahay Dawladda fududeynta qoraallada arrimaha sharciga ah iyorasmiyeyntooda.
11) Dhawridda sharciga, cadaaladda iyo sinnaanta dhinacyada helaya adeegyada Nootaayaha Dadweyne iyo ilaalinta dantaguud ee dadweynaha iyo Qarankaba.
12) Ka-fogaanshaha iska-hor-imaadka danaha (conflict of interests) dhex-mari kara Nootaayaha iyo dhinacyada uu la-talinayo ama uu wakiilka ka yahay.

**Qodobka 5aad:**
**Hawlaha ka Reebban Nootaayaha Dadweynaha**

Nootaayaha Dadweynaha waxaa ka reebban in uuqabtoshaqooyinka soo socda:

1) Shaqada Dawladda amaHay'adaheeda;
2) Inuu ku shaqeysto mihnad qareennimo ama inuu cid ku matalo dacwadmaxkamadeed;
3) Inuu noqdo ganacsade leh meherad ka baxsan nootaayada;
4) Inuu qabto xil siyaasadeed

**Qodobka 6aad:**
**Waxyaabaha Sharci ahaan loo ogolyahayin uu qabto Nootaayaha Dadweynaha**

Nootaayaha waxaa loo oggolyahay inuu qabto shaqooyinka soo socdaoo ka baxsan nootaayennimada:

1) Shaqooyinka la xiriira macallinimada;
2) Shaqooyinka la xiriira hawlaha samafalka;

**Qodobka 7aad:**
**Noocyada Rukhsadda**

Noocyada rukhsadaha soo socda oo nootaaye dadweyne haaystaa ayaa ka howl gali karaa dhulka Jamahuuriyadda Federaalka Soomaaliya:

1) Nootaayada haysata rukhsadda heer Federaal waxay ka hawl-geli kartaa dhammaan xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);
2) Nootaayada haysata ruqsad heer Dawlad- goboleed waxay ka hawl-geli kartaa dhammaan dhulka Dawlad-goboleedka rukhsaddasiiyay;
3) Nootaayada haysata Rukhsadda heer Dawlad-goboleed kama hawl-geli karto heer Federaal ilaa iyo inta ay ka heleyso Rukhsad heer Federaal ah.

**Qodobka 8aad:**
**Shaabbada Nootaayada Dadweyne**

1) Qaab ahaan, shaabbada Nootaayada Dadweyne waa in ay dhexdeeda ka muuqato Astaanta Qaranka, Magaca iyo Lambarka ay ku soo baxday Rukhsadda Nootaayada, iyadoo aysan

wehlin wax cinwaan ama calaamadkale;

2) Haddii ay nootaayo Dadweyne doonayso in ay sameysato shaabbad cusub ama ay wax ka beddesho calaamadaha iyo cinwaankeeda, waa in ay marka hore oggolaansho ka hesho Golaha Nootaayooyinka;
3) Haddii ay lunto shaabbad Nootaayo Dadweyne, wuxuu Golaha Nootaayooyinka u oggolaanayaan mid kale, taasoo leh naqshad gaar ah oo ka duwan tii hore uga luntay, haddii dib loo soo helo shaabbadii hore ma isticmaali karo Nootaayaha, wuxuuna isla markiibadib ugu celinayaa Golaha Nootaayooyinka.

**Qodobka 9aad:**
**Furidda Xafiis Nootaayo**

1) Marka la furayo Xafiiska Nootaayo waa in lagu wargeliya Wasaaradda Cadaaladda heer Federaal iyo heer Dawlad-goboleed, isla markaana laga diiwaan-geliyo goobta Xafiiska laga furayo.
2) Caddeynta furitaanka Xafiiska Nootaayada waa in ay u soo saarta Wasaaradda Cadaaladda shahaado oggolaasho oo uu saxiixey Agaasimaha Waaxda Garsoorka, kaddib marka laga soo buuxiyo warbixinnada lagama-maarmaanka ah.

**Qodobka 10aad:**
**Guuridda Nootaayo**

1) Nootaayada u guuraysa goob kale oo ay uga hawl-geli karto isla Rukhsadda ay haysato, waxay codsi oggolaansho soo weydiisanaysa Wasaaradda Cadaaladda ee Federaal ama Wasaaradda Cadaaladda ee Dawlad-goboleed, iyadoo soo marineysa codsigeeda Golaha Nootaayooyinka, haddii ay oggolaanshaha hesho waa in ay ka furataa xafiis goobtacusub ee loo oggolaaday muddo ku siman 3 (saddex) biloodgudahood.
2) Nootaayada sooma weydisan karto codsi ka-guurid goobteeda shaqo muddo 2 (labo) sano gudahood ah, laga bilaabo taariikhda oggolaanshii hore, haddii aysan jirin sababo meel–mar ah oo ay ku qanci karaan Wasaaradda Cadaaladda & Golaha Nootaayooyinka.
3) Haddii ay ku timaado Nootaayaha duruuf maan-gal ah oo khasabk Dhigeysa in uu ka guuro goobtiisii uu shaqada ku qaban jiray waxa uu codsi Oggolaansho soo weydiisanayaa Wasaaradda Cadaaladda ee Federaal ama Wasaaradda Dawlad-goboleed, isagoo soo marinaya codsigiisa Golaha Nootaayooyin

**Qodobka 11aad:**
**Magacaabidda Nootaayada**

Nootaayada waxaa lagu magacaabayaa Dikreeto Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda ee Federaalka ama Wasiirka Cadaaladda ee Dawlad-goboleedka, kaddib marka ay soo marto hab-raacyada ku xusan Xeerkan, iyadoo lagu soo saarayo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JFS ama Dawlad-goboleedka laga bixiyey.

**Qodobka 12aad:**
**Sababaha Waayidda Rukhsadda Nootaayaha**

1) Nootaayaha wuxuu ku waayi karaa Rukhsadda Nootaayo Dadweyne, haddii:
   a. Uu geeriyoodo;
   b. Uu gudan-waayo shaqadiisa Nootaayanimo caafimad-darro xagga maanka ama jirka ah awgiis;

c. Uu ka tanaasulo mihnaddiisa Nootaayanimo;
d. Uu qabto xil kale ee hay'adaha Dawladda ama hay'adaha gaarka looleeyahay;
e. Uu gaaro da'da hawl-gabka nootaayada oo ah in uu gaaro 80 (sideetan) sanojir:
f. Lagala noqdo Rukhsadda Nootaayada anshax-xumo baahsan awgeed.

2) Marka uu takhtar ku xeel dheer cudurada dhimirka soo cadeeyofayoobi-darrada, Nootayaha waxaa lagala noqonayaa rukhsada nootaayennimada.
3) Haddii uu nootaayaha ka joogsado sabab la'aan shaqada Nootaayanimo muddo ka badan 3 (saddex) bilood, waa lagala noqonayaa Rukhsadda Nootaayanimo.

## Qodobka 13aad:
## Shuruudaha Codsadaha Notaayada

1) In uu yahay Soomaali Muslim ah;
2) In aysan dad'diisu ka yarayn 25 (shan iyo labatan) sano jir;
3) In uu codsi qoraal ah u soo gudbiyo Wasaaradda Cadaaladda ee heer Federaal ama heer Dawlad-goboleed;
4) In uu haysto ugu yaraan 1 (hal) sano oo tababar adeeg Nootaayo ah oo uu caddeeyey qof leh xafiis Nootaayo iyo waayo-aragnnimo;
5) In uu ka gudbo imtixaanka qiimeynta Nootaayada oo ay qaado Wasaaradda Cadaaladda ee heer Federaal ama heer Dawlad-goboleed;
6) In uu haysto Shahaado shahaado shahaado Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay ,gaar ahaan Shareecadda iyo Qaanuunka amaaqoon u dhiganta;
7) In uu dhimmir ahaan fayo-qab yahay:
8) In uusan gelin fal-dembiyeed culus oo Maxkamadda si kama dambays ah ugu xukuntay, si waafaqsan qodobka 15aad X.C.S.
9) In uu leeyahay hab-dhaqan iyo anshax wanaagsan; iyo
10) In uu bixiyo khidmadda diiwaan-gelinta codsiga oo ah US Doollar 50 (konto doollarka Maraykanka ah) ama Shillin Soomaali u dhigma.

## Qodobka 14aad:
## Hab-raaca Diiwaan-gelinta Nootaayada

Hab-raaca Diiwaan-gelinta Nootaayada wuxuu noqonayaa sidan soo socota:

1) Waxaa lagu diiwaan-gelinayaa Nootaayada heer Federaal marka uu Adeeg-bixiyuhu soo maro hab-raacyada ku xusan Xeerkan ee Diiwaanka Wasaaradda Cadaaladda ee heer Federaal;
2) Waxaa lagu diiwaan-gelinayaaNootaayada heer Dawlad-goboleed marka uu Adeeg-bixiyuhu soo maro hab-raacyada ku xusan Xeerkan ee Diiwaanka Wasaaradda Cadaaladda eeDawlad-goboleedka.

## Qodobka 15aad:
## Hab-raaca Rukhsad- bixinta Nootaayada

1) In la hirgeliyo dhamman shuruudaha looga baahan yahay codsadaha Nootaayada si waafaqsan sida ku cad qodobka 12aad ee Xeerkan.
2) In Nootaayaha Dadweyne uu ugu horreyntii waa inuu diiwaangashan yahay inta uusan qaadan tababarkanootaayennimada.
3) In Wasaaradda Caddaaladda ee heer Federaal amase heer Dawlad-goboleed,kaddib marka ay soo daristo baahida ka jirta goobta u baahan Nootaaye Dadweyne, waa iney soo

diyaariso, kana qaaddo imtixaan codsadaha doonaya ruqsadda nootaayennimada, kaasoo ku saleysan aqoonta shuruucda federaalka, kuwa Dawlad-goboleedyada iyo hawlaha nootaayennima ay kahawlgalaan.

4) Haddii ay dhacdo in qof imtixaan la'aan la siinayo Rukhsad Nootaayo, waxaa lagama-maarmaan ah in uu leeyahay aqoon iyo waayo- aragnimo dhanka Nootaayada, Garsoore, Xeer- Ilaaliye, la taliye sare ee sharci ama sharci qore sare ee hay'adaha Dawladda ama **Qareen,** kuwaas oo kusoo **shaqeynayey mihnadaan** ugu yaraan muddo 5(shan) sano ah.
5) Marka ay dhammeystirmaan shuruudaha iyo hab-raacyada qofka imtixaan la'aan la siinayo Rukhsadda Nootaayada ee ku xusanfaqradda (4) ee qodobkan, Wasiirka Cadaaladda ee Federaalka ama Wasiirka Cadaaladda Dawlad- goboleedka ayaa Dekreeto oggolaansho Nootaayo ku magacaabayo qofkaas.
6) Kaddib dhaqan-galka xeerkan, Nootaayada Dadweynaha ee **waqti xaadirkan** shaqeysa, isla markaana haystaoggolaanshahaWasiirka Wasaaradda Cadaaladda Wasaaraddu imtixaan la'aan ayey siinaysaa magacaabid kaddib marka la caddeeyo in uu ku qaatay hab-raac sax ah.
7) Diiwaan-gelinta koowaad iyo Rukhsad- bixinta loo sameynayo Nootaayada, kaddib marka uu ku guuleysto imtixaanka qiimeynta waxaa laga qaadayaa khidmad lacageed oo ah Shilling Soomaali u dhiganta US. 1000 (kun Doolarka Mareykankaah).
8) Nootaayo Dadweyne kasta waxaa loo sameynayaa diiwaan-gelin sanadle ah, iyadoo Wasaraddu siinayso *Shahaado Diiwaan- gelinta & Rukhsad Aqoonsi* kaddib marka uu bixiyo khidmadda sanadlaha ah lacag shling Soomaali ah oo u dhiganta US 500 (shan boqol Doolarka Mareykankaah).

## Qodobka 16aada:
## Dhaarta Nootaayaha

Nootaayuhu wuxuu ku hor dhaaranayaa Guddiga Rukhsad-bixinta heer Federaal ama Guddiga Rukhsad-bixinta heer Dawlad- goboleed, waxayna dhaartu u dhacaysa sidan: ***Waxaan ku dhaaranayaa Magaca Alle in aan u guto xirfadayda Nootaayannimo, Qorista dukumintiyada dadweyne iyo talo-siinta si waafaqsan shuruucda Dalka, sharafta, madax-banaanida, karaamada aadanaha, sidoo kalena dhawro akhlaaqda xirfadeed ee Nootaayaha, in aan xafido sirta xirfadeed, uguna adeego si hagar-la'aan ah danaha dadka I wakiishay iyo danta guud ee cadaaladda dalka.***

## Qodobka 17aad:
## Tababarka Nootaayaha

1) Diiwaanka tababarka Nootaayaha waxaa haynaya Golaha Nootaayooyinka, qofkii rabo in uu qaato tababar Nootaayo waa in uu codsi u soo qortaa Golaha Nootaayooyinka, kuna soo lifaaqaa shahaadooyinkiisa, sida ku cad qodobka 13aad ee Xeerkan
2) Golaha Nootaayooyinka waa in la soo weydiiyo waqtiga ka qeyb galka tababarka Nootaayaha waana in uu u sammeeyaa diiwaan gaar ah, iyadoo dukumentiga oggolaashaha lagu caddeynayo:
    a. Macluumaadka goobta iyo taariikhda dhalasho;
    b. Deegaanka ka qeyb galaha;
    c. Taariikhda uu dhammeystay Jaamacadda; iyo
    d. Magaca Nootaayada uu ku qaadanaayo tababarka.

3) Tababarka waa in uu noqdaa mid wax-ku- ool ah oo joogto ah, haddii uu kala-go' yimaado, tababartayaasha waa in ay la tashi kala sameeyaan Golaha Nootaayooyinkamuddada ka hartey Tababarka iyo sida loo dhameestarayo.
4) Tababartayaasha uu kala go'u ku yimid tababarkooda waa in ay la yimaadaan caddeymo tilmaamaya sababaha keenay kala go'idda tababarka, haddii lau qanco caddeymahooda, Golaha Nootaayooyinka ayaa u sameynaya diiwaa-gelin cusub ee tababar.
5) Tababartaha raba sii-wadashada tababarka ee Nootaayo kale waa in uu caddeyn u soo gudbiya Golaha Nootaayooyinka, isagoo soo gudbinaya caddeynta gudashada waajibaadka tababarkiisii hore iyo sidoo kale caddeynta oggolaanshaha Nootaayada kale ee uu rabo in uu ka sii watotababarka.
6) Kama qeyb-geli karaan tababarka Nootaayada dadka da'doodu ka weyn tahay 60 (lixdan) sano ama ka yar 24 (afr iyo labaatan) sano xilliga tababarka la shaacinayo.
7) Muddada tababarka Nootaayada waa 1(hal) sano.

## Qodobka 18aad:
## Qaabka Qoraallada Nootaayada

1) Qoraalka Nootaayaha ma noqonayo mid ansax ah haddii aysan goob-joogeyaal ka ahayn dhinacyada arrintu khuseyso iyo ugu yaraan 2(labo) markhaati, haddii uusan tilmaamin sharci kale oo tibaaxaya sidaas si ka duwan.
2) Goob-joognnimada markhaatiyaasha muhiim ma ahan haddii qoraalladu ku saabsan yihiin:
    a. Marka lagu xafidanayo Xafiiska Nootaayada dokumentiyo ay Hay'adaha Dawladdu bixiyeen, kuwaasoo noqon kara asal amase nuqul,dokumentiyo gaar ahaaneed oo si Xeerka waafaqsan loo kalaqortay;
    b. Kolka uu Nootaayuhu saxiixayo amase u tasdiiqinayo buugag ganacsi amase dokumentiyo kale, qoraallo la tarjumay;
    c. Kolka Nootaayaha uu tasdiiqayo waraaqaha ganacsi oo la isugu wareejiyo marka gadaal laga saxiixo; iyo
    d. Kolka uu Nootaayuhu tasdiiqayo qoraallo ka soo baxay Hay'adaha Garsoorka ee Dawladda, Federaalka ama Dawlad-goboleedka u qoran yihiin sida waafaqsan shuruucda iyo Nidaamka Maaliyadeed ee Dalka.
3) Marka qoraallada bilow ilaa dhammaad la sameynayo, waxaa qasab ah in la mideeyo rabitaanka dhinacyada iyo joogitaankooda, isla markaana marka la qoro loona aqriyo qoraalka waa in ay rabitaankooda kuoggolaadaan.
4) Nootaayaha waa in uu shakhsi ahaan u hubiyaa xaaladaha shakhsiyadeed ee dhinacyada, haddii uu aqoonsan-waayo waa in la helaa 2 9labo) qof oo lagu kalsoon yahay oo yaqaana qofka, waxayna noqonayaan markhaatiyaal.
5) Markhaatigu waa in uu noqdaa qof wata Dokumenti aqoonsi (ID Document) oo leh raad-raac sugan ee lagu kalsoonaan karo, da'diisuna aysan kayarayn 18 (sideed & toban) sano, dhimmir ahaana uu fayo-qab yahay, isla markaana aan dan gaar ah ka lahayn qoraalka dhinacyada ee uu markhaatiga ka noqonayo.
6) Markhaati ma noqon karo qof haddii:
    a. Uu da' ahaan ka yar tahay 18 (sideed iyo toban) sano:
    b. Uu dhega la'yahay;
    c. Uu carab la'yahay (uusan hadli Karin);
    d. Uu dhimmir la'yahay; kh) Uu indho la'yahay; ama
    e. Uu yahay dembile baxsad ah;

## Qodobka 19aad:
## Fal-dembiyeedyada ka Dhasha Qoraallada

1) Haddii uu faafiyo dokumentiyada ama qoraallada uu u hayo dadweynaha, taasoo dhibaato ku keeni karta dadka uu u adeegayo, wuxu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan Qodobka 478ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS):
   a. Haddii uu wax-ka-beddelo, burburiyo,qariyo, dano gaar ah ugu isticmaalo, si dhagar ku jirto, si uu faa'iido uga helo dokumentiyada ama qoraallada oo uu dhinacyada u hayo sababo awooddiisa ama xirfaddiisa laxiriirta awgeed, wuxuu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan qodobka 379 ee XCS;
   b. Haddii uu sameeyo qoraallo ama dokumentiyo been-abuur ah, wuxuu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan Qodobka 366aadiyo 369ee XCS; ama
   c. Haddii uu khiyaano la yimaado ama uusan ilaalin sharuucda Dalka, wuxuu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan Qodobka 496 ee XCS.
2) Haddii uu qabto qorallo si toos ah u khuseeya isaga ama xaaskiisa, qof waaalidkood ka mid ah, qaraabadooda hoose (close relatives), qof uu wakiil u yahay ama warqado sir ah oo isagu markhaati ka yahay ama lagu xusay qof madax ah oo isagu diiwaan-geliyey, wuxuu mutaysanayaa anshax-marin ku aadan ganaax lacageed oo u dhexeeya US.1,000 (kun) ilaa 5,000 (Shan kun) Doolar Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma amase shaqo-ka-joojin muddo kooban oo aan ka badnayn 6 (lix) bilood ama labadaba oo la isugu daro, haddii xadgudubku culus yahay, balse haddii falkaas xad-gudub uu soo noqdo markel, wuxuu keeni karaa in Nootaayaha Rukhsadda laga noqdo, isla markaana laga tirtiro Diiwaanka Guud ee Nootaayooyinka Dadweynaha.
3) Haddii uu qabto qoraallo uusan sharcigu u oggolayn ama lid ku ah dhaqanka suuban iyo nidaamka asluubta guud ee Ummadda, wuxuu mutaysanayaa ganaax lacageed oo dhan ilaa US. 1000 (kun Doolar Mareykanka ah) ama Shillin Soomaali u dhigma ama shaqo-ka- joojin muddo kooban oo aan ka badnayn 3 (saddex) bilood; balse haddii falkaas xad-gudub uu soo noqdo markale, wuxuu keeni karaa in Nootaayaha Rukhsadda laga noqdo,isla markaana la tirtiro Diiwaanka Guud ee Nootaayooyinka Dadweynaha.
4) Haddii uu la macaamilo Nootaayaha shaqsi ama Hay'ad ama Ururo kuwaas oo ay saaran tahay cunaqabateen dhaqaale ama la xanibay Hantidooda ama laga mamnuucay dalka soomaaliya, taasoo warbixintooda horey loo soo gaarsiiyey si toos ah ama si dadban, waxaa lagu ciqaabayaa 5 (shan) sano oo xarig ah ama ganaax qiimahiisu dhanyahay US.10.000 (toban kun) oo doolar Mareykan ah ama shilling soomaali u dhiganta ama labadaba.
5) Haddii ay ku caddaato Nootaayaha mar kale in uu galay dembiga lagu xukumay sida ku xusan faqrada (4) ee qodobkan waxaa lagala noqonayaa RukhsadaNootaayonimo.

## Qodobka 20aad:
## Xurmeynta Nootaahaya

1) Marka laga soo tego xuquuqda aasaasiga ah ee uu muwaadinka leeyahay sida ku cad Dastuurka KMG, Nootahaya dadweyne. Wuxuu yeelanayaa qaddarin gaar ah inta uu huwanyahay maqaamka nootaayanimada- maadaama dowladdu ku amintay shaqo gaar ah ee loogu adeegayo umadda soomaaliyeed. Dhinaca qoraalada sharci ku dhisan ee dhexmara dhinacyada khuseeya sida ku xusan qodobka 4aad islaxeerkan.
2) Nootaayaha laguma oogi karo dacwadciqaab ah ama madani ahoo ka dhalatay fal la xiriira

gudashada xilkiisa nootayanimada hadii aan ogolaansho laga helin guddiga anshaxmarinta ee Golahanootaayooyinka.

3) Nootaayaha lama baari karo qofnimadiisa ama hoygiisa, xafiiskiisa iyo qoraaladiisa hadii aan ogolaansho laga helin guddiga anshaxmarinta ee Golaha nootaayooyinka ee labada heer Dowladda Soomaaliya
4) Nootayaha tuhun laguma xiri karo hadii aan loogu imaan isaga oo dembi faraha kula jira ama meelmarinta dacwadda loo haysto aan lagu qancin wasiirka wasaaradda cadaaladda iyo guddiga anshaxmarinta Golaha nootaayooyinka ee labada heer ee Dowladda huwanyahay maqaamka nootaayanimada- maadaama dowladdu ku amintay shaqo gaar ah ee loogu adeegayo umadda soomaaliyeed. Dhinaca qoraalada sharci ku dhisan ee dhexmara dhinacyada khuseeya sida ku xusan qodobka 4aad islaxeerkan.
5) Nootaayaha laguma oogi karo dacwadciqaab ah ama madani ahoo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiisa nootayanimada hadii aan ogolaansho laga helin guddiga anshaxmarinta ee Golahanootaayooyinka.

## Qodobka 21aad:
## Xaddidaadda Shaqada Nootaayaha

1) Habka hawl-galka Nootaayaha iyo qoraalladiisuba waxay ku xaddidnaanayaan goobaha iyo heerarka lagu caddeeyey Rukhsaddiisa Nootaayada Dadweynaha, kuwaas oo kala ah:
   a. Nootaayo heer Federaal; iyo
   b. Nootaayo heer Dawlad-goboleed.
2) Nootaayaha marka uu codsanayo Rukhsadda Nootaayanimada waa in uu codsigiisa ku caddeeyo goobta uu doonayo in uu ka furto Xafiiska Nootaayada Dadweynaha iyo heerka uu rabo in uu ku hawl-galo (heer Federaal ama heer DXF). Sidoo kale, Guddiga Rukhsad-bixinta Nootaayada Dadweynaha waa in uu tixgeliyaa codsiga Nootaayaha marka uu ku guulaysto Imtixaanka Qiimeynta.

## Qodobka 22aad:
## Xushmada Nootaayada

1) Nootaayaha wuxuu xaq u leeyahay in uu ujuuro ama xushmad ka helohawl-qabadkiisu la xiriira xadba inta ay la'egtahay tirada qoraallada uu u qoraayo ama u diyaarinaayo macaamiishiisa.
2) Xushmada heshiiska dhinacyada ee qoraallada waxay ku eg tahay waqtiga heshiiska la diiwaan-geliyo oo uumacmiilku qaato.
3) Hadduu Nootaayaha uu ka baxo heshiiska sabab la'aan waa in uu u celiyaamacaamishisa lacagtii xushmad ahaan uu hore ugaqaatay.
4) Haddii macamiishu u wareegaan Nootaayo Dadweyne ee kale, iyadoo heshiiskii Nootaayadii hore uu weli taaganyahay, heshiiska Nootaayada cusub ma saameynayo heshiiskii hore, xaqna looguma leh Nootaayihii hore in uu celiyo xushmadii hore loo siiyey ama lagula heshiiyey, maadaama uu ku taagan yahay heshiiskii hore. Xushmada Nootaayada ee la bixinayo waxaa lagu faahfahinayaa Xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka Cadaaladda ee heer Federaal ama Dawlad-goboleed oo la-tashi la sameeyey dhammaan dhinacyada ay arrintani khusayso.

## Qodobka 23aad:
## Xirfadda Nootaayaha

1) Qofna kama shaqeyn karo xirfad Nootaayo Dadweyne , mana qaadi karo mas'uuliyad Nootaayanimo, isagoo aan Rukhsad ka haysan Guddiga Rukhsad-bixinta ee uu tilmaamay Xeerkani.
2) Waxaa keliya ee xirfad Nootaayo ku shaqeyn kara sharci-yaqaan magaciisa lagu qoray Diiwaanka Nootaayooyinka heer Federaal ama heerDawlad-goboleed.
3) Qofna lama siin karoRukhsad Nootaayanimo haddii uu ka tirsan yahay Goleyaasha Dawladda ee heer Federaal, heer DXF, Hay'adaha Garsoorka iyo Maamulka, Shaqaalaha Rayidka, Ciidamada Qalabka-sida (CQS), Danjireyaasha, Madaxda Shirkadaha waaweyn ee Ganacsiga iyo qof kasta oo hawlo kale ee mihnadeed si gaar ah ugu shaqeysta.
4) Qofna iskuma magacaabi karo ama looguma yeeri karo mansabka Nootaayaha haddii uusan ku jirin Diiwaanka Guud ee Nootaayooyinka; haddii taasi dhacdana wuxuu qofkaasi gelayaa fal-dambiyeedka ku xusan Qodobka 274aad ee XCS.
5) Nootaayuhu wuxuu ku shaqeysan karaa xirfadiisa/mihnadiisa Nootaayanimokeligiis.
6) Waxaa sharci ahaan la ogol yahay in laba Nootaayo amaka badan ay wada galaan heshiis ay ku noqonayaan shuraako sidaasna ay kuwada shaqeystaan oo ay wada yeeshaan hal xafiis Nootaayo iyo Faracyo kale oo shirkadooda hoos yimaada haddii goobta loo xaddiday ee ay shaqada Nootaayadaku fulinayaan ay isku mid tahay.

## Qodobka 24aad:
## Nootaayo Caalami ah

Nootaayo Caalami ahwaxay ka hawl-geli kartaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya haddii ay oggolaadaan Guddiga Rukhsad- bixinta Nootaayooyinka heer federaal iyo Wasaaradda Cadaaladda Federaalka, iyadoo ay taasi ku xiran tahay in codsadaha Dawladiisa asalka ah ay sidaas oo kale u oggoshahay Nootaayaha Soomaaliyeed.

## CUTUBKA SADDEXAAD:
## HAWLAHA GUDDIGA
## Qodobka 25aad:
## Guddiga Rukhsad-bixinta Nootaayada

1) Guddiga Rukhsad-bixinta Nootaayada Dadweynaha ee heer Federaal wuxuu ka kooban yahay:
    a) **1 (hal)** xubin oo ka socota Maxkamadda Sare ee Federaalka;
    b) **2 (labo)** Sharci-yaqaan oo ka tirsan Waaxda Garsoorka Wasaaradda Cadaaladda Federaalka;
    c) **2 (labo)** Xubnood oo ka socda Golaha Mideysan ee Nootaayooyinka ee heer Federaal.
2) Guddiga Rukhsad-bixinta Nootaayada Dadweynaha heer DXF wuxuu ka kooban yahay:
    a) **1 (hal)** Xubin oo ka socda Maxkamadda sare ee Federaalka.
    b) **2 (labo)** Sharci-yaqaan ka tirsan Waaxda Garsoorka Wasaaradda Cadaaladda ee Dawlad-goboleedka;
    c) **2 (labo)** Xubnood oo ka socda Golaha Mideysan ee Nootaayooyinka heer DXF.

## Qodobka 26aad:
## Waajibaadka Guddiga Rukhsad-bixinta

Waajibaadka Guddiga Rukhsad-bixinta ee heer Federaal iyo heer Dawlad-goboleedba waa:

1) Bixinta Rukhsadaha Nootaayada Dadweynaha;
2) Diiwaan-gelinta Nootaayaha buuxiya shuruudaha ku tilmaaman qodobka 13aad iyo hab-raacayada kale ee ku xusan sharcigan;
3) Ansixinta iyo wax-ka-beddelka Xeer- hoosaadka Guddiga;
4) Xog-uruurinta ku saabsan araajida codsadeyaasha NootaayadaDadweynaha;
5) Keydinta iyo habeynta diiwaanka Nootaayada;
6) Uruurinta magacyada, taariikh- nololeedyada, shahaadooyinka iyo cinwaannada Notaayooyinkadiiwaan-gashan;
7) Hubinta dokumentiyada iyo shahaadooyinka codsadeyaasha, iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Cadaaladda Federaalka ama Wasaaradda Cadaaladda Dawlad-goboleed.
8) Gacan-ka-geysashada qaadista imtixaanaadka Nootaayanimada ee uu diyaarinayo Guddiga Imtixaanka heer Federaal ama heer Dawlad-goboleed;
9) Qaadista imtixaanka Afka ah eedarajadiisu tahay 20%, si loo hubiyo tayada iyo aqoonta codsadaha;
10) Xafididda diiwaannada, dokumintiyada iyo qoraallada kale ee muhiimkaah;
11) Anshax-marinta Xubnaha Golaha Nootaayooyinka haddii lagu soo eedeeyo xad- gudub fal-dembiyeed xil-gudasho-xumo baahsan ama anshax-xumobaahsan
12) Shaqo-ka-hakin, shaqo-ka-joojin iyo rukhsad-kala-noqosho Nootaayooyinka Dadweyne.

## Qodobka 27aad:
## Muddada Xil-haynta Guddiga

1) Xubnaha Guddiga Rukhsad-bixintu waxay xilka haynayaan muddo 3 (saddex) sano ah, waxaana loo cusbooneysiin karaa 1(hal) mar ookeliya.
2) Muddo 30 (soddon) maalmoodgudahood ah, oo ka bilaabata maalinta Xeerkani dhaqan-gal noqdo , waa in Hay'adaha ay khuseyso soo magacaabaan xubnaha Guddiga uga mid noqonaya, iyagoo u soo gudbinaya Wasaaradda Cadaaladda Federaalka ama Wasaaradaha Cadaaladda ee Dawlad- goboleedka.
3) Wasiirka Cadaaladda Federaalka ama Wasiirka Cadaaladda Dawlad-goboleedkaayaa Dikreeto ku soo saaraya magacaabidda Xubnaha Guddiga.
4) Wasaaradda Cadaaladda Federaalka ama Wasaaradda Cadaaladda Dawlad-goboleedku waxay u qabaneysaa Guddiga fadhi muddo 10 (toban) maalmood Gudahood ah oo ka bilaabanaysa maalinta la soo dhammeystiro magacaabista Xubnaha Guddiga, waxaana shir- guddoominaya fadhiga Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda Federaalka ama Agaasimaha Guud Wasaaradda Dawlad- goboleedka ama qof uu u wakiishay ooka ss tirsan Wasaaradda.

## Qodobka 28aad:
## Hab-raaca Imtixaanka Qiimeynta Nootaayada

Si loo siiyo Rukhsad codsadahaNootaayada waxaa looga baahanyahay:

1) In uu ka diwaan-gashan yahay Xafiiska Madaxa Xirfadleyda ee Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda heer Federaal ama heer Dawlad-goboleed iyo in uu soo dhammeystay tababarka adeegga Nootaayada ee muddadii loogabaahnaa.
2) In Imtixaanka qiimeynta uu qaado Guddi ka kooban 3 (saddex) xubnood oo kala ah:

b)Bare Kuuliyadda Sharciga ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS) ama Jaamacadaha kale ee Sharciga dhiga ee la aqoonsanyahay:

a. Garsoore Maxkamadda Sare ee Federaalka ama Maxkamadda sare ee Dawlad-goboleedka ee meesha codsaduhu ka hawl-gelayo; iyo
b. Madaxa Xirfadleyda ee Waaxda Garsoorka ama sharci-yaqaan ka tirsan Wasaaradda Cadaaladda Federaalka ama Dawlad- goboleedka.

3) Xubnaha Guddiga imtixaanka ee ku xusan faqradda (2) ee isla qodobkan, waxaa wareegto rasmi ah ku magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda heer Federaal ama heer Dawlad-goboleed, kaddib marka uu dhegaysto soo-jeedinta Agaasimaha Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda Federaalka ama Agaasimaha Waaxda Garsoorka Dawlad-goboleedka oo ku saleysan natiijadii ay soo gudbiyeen Guddiga Imtixaanka QiimeyntaNootaayada.
4) Xilalka Xubnaha Guddiga qaadaya imtixaanka qiimeyntawaa:
   a. **Guddoomeye** waa Garsoore ka tirsan Maxkamadda Sare ee Federaalka ama Maxkamadda sare ee Dawlad-goboleedka ee meesha codsadaha Nootaayadu ka hawl-galayo;
   b. **Xoghaye** waa Madaxa xirfadleyda ee Waaxda Garsoorka Wasaaradda Cadaaladda heer Federaalka ama Heer Dawlad-goboleed
   c. **Xubin,** Bare Kuuliyadda Sharciga ee JUS ama Jaamacadaha kale ee sharciga ee lagu kalsoon yahay.
   d. Muddada qaadista imtixaanka qiimeynta waxay noqonaysaa 1 (hal) sano mar,haddii aysan jirin baahi degdeg ah ama tiro codsadeyaal ah oo aan ka yarayn 9 (sagaal) xubnood ooisa-soo-gaaray.
   e. Maaddooyinka imtixaanka qiimeynta lagu qaadayo waxay isugu jiraan:
      i. Xeerka Madaniga;
      ii. Arrimaha Ganacsiga;
      iii. Habka qorista sharciyada & heshiisyada;
      iv. Arrimaha xusuus-dhawrka & canshuuraha; iyo
      v. Axkaamta Mucaamalaadka islaamka (Fiqiga).
5) Dhibcaha lagu gudbayo imtixaanka qiimeynta waa ugu yaraan 60%.
6) Qabashada codsiyada Nootaayada iyo habeynta imtixaanka qiimeynta waxaa u xilsaaran Madaxa Xirfadleyda ee Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda Federaalka ama Dawlad-goboleedka.
7) Wargelinta qiimeynta imtixaanka waxaa lagu soo saarayaa Dikreeto Wasiirka Cadaaladda heer Federaal ama heer Dawlad-goboleed oo qeexaysa taariikhda arji-qabasha, dokumentiyada iyo shuruudaha laga doonayo ka-qeyb-galayaasha tartanka.
8) Ka-qeyb-galayaasha tartanka qiimeynta imtixaanka waxaa go'aaminaya Wasiirka Cadaaladda heer Federaal ama heerDawlad- goboleed, kaddib marka uu si habboon u darso dhammaan araajida codsadeyaasha iyo dokumentiyada ku lifaaqan, si waafaqsan hannaanka hab-dhaqanka ee meel-markaah.
9) Xilka kormeeridda hawlahaGuddiga Qiimeynta ee codsadaha Nootaayada waxaa leh Wasiirka Wasaaradda Cadaaladdaheer Federaal amah err Dawlad-goboleed ama ciddii kale ee uu u wakiisho, wuxuuna awood u leeyahay sixidda haddii wax khaladaad ahi dhacaan.

## Qodobka 29aad:
## Imtixaan-ka-dhaafid

1) Imtixaanka helitaanka Rukhsadda Nootaayada waxaa laga dhaafayaa dadka soo socdo, iyadoo la tixraacayo shuruudaha ku xusan qodobka 5aad ee Xeerkan:
   a. Qofka haysta shahaado sharci oo Diktoorada ah (PhD) lehna khibrad 5 (shan) sano oo ku aaddan arrimaha Nootaayonimada ama Hay'adaha Garsorka ama Qareennimo;
   b. Qofka muddo 5(shan) sano ah ku shaqeynayey sharciga, isagoo ka hawl-gelayey hay'ad dawladeed ama hay'ad kale ee qaabilsan arrimo sharci ah;
   c. In uu ahaa Bare Jaamacad sharci muddo 5 (shan) sano ah.
2) Dadka imtixaanka laga dhaafayo ee k u xusan xarfaha (b, t & j) ee faqradda 1aad ee isla qodobkan, waa in ay kala yimaadaan caddeymo ku filan hay'adaha ay lashaqeynayeen.

## Qodobka 30aad:
## Hab-raacyada Dacwadaha Anshax-marinta

Hab-raacyada loo marayo qaadista ama dhegaysiga dacwadaha anshax-marinta, waa:

1) Haddii ay soo gaarto Guddiga cabasho lid ku ah Nootaayada lagu tuhmay xad-gudub ku saabsan shaqadiisa iyo anshaxiisa;
2) Guddigu wuxuu u qabanayaa maalinta uu ku dhageysto cabashada, muddo aan ka yarayn 15 (shan & toban) maalmood, waxaana ogeysiis loo dirayaa Nootaayaha iyo Hay'adda ama qofka ka soo cawday;
3) Guddiga waa in uu dhageystaa cabashada Nootaayada laga soo gudbiyey iyo jihada ama qofka soo gudbiyey; iyo
4) Guddiga wuxuu kaashan karaa hay'adaha Dawladda haddii loo baahdo si loo gaaro runta iyo cadaaladda.

## Qodobka 31aad:
## Go'aannada Anshax-marinta Nootaayooyinka

Guddiga Rukhsad-bixinta iyo anshaxa ee ku xusan qodobka 23aad ee xeerkan, wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro go'aanno anshax-marin oo ay ka mid yihiin:

1) Digniin af ah oo loo soo jeediyo Nootaayada laga soo cawday;
2) Digniin qoraal ah oo la gaarsiiyo Nootaayada laga soo cawday.
3) In la ganaaxo Nootaayada lacag aan ka badnayn US.200 (labo boqol doolar Mareykanka ah) ama shillin Soomaali u dhigma;
4) In shaqada Nootaayada laga joojiyo muddo aan ka badnayn sanad;
5) In laga saaro Nootaayada xubinnimada GolahaNootaayooyinka oggolaanshaha aqlabiyadda xubnaha Golaha Nootaayooyinka; iyo
6) Haddii go'aanka shaqo-ka-joojinta uu noqdo mid kama-dambays ah, looma oggola Nootaayaha shaqada laga joojiyey in uu sii wato shaqadiisa;
7) Go'aanka ka saaridda xubinnimada Nootaayada wuxuu ku xiran yahay oggolaanshaha aqlabiyadda xubnaha Golaha Nootaayooyinka; iyo
8) Haddii go'aanka shaqo-ka-joojinta uu noqdo mid kama-dambays ah, looma oggola Nootaayaha shaqada laga joojiyey in uu sii wato shaqadiisa.

## Qodobka 32aad:
## Cabasho iyo Racfaan ka Qaadasho

Cabashada iyo Racfaan-ka-qaadashada go'aannada Anshax-marinta waa:

1) Go'aanka anshax-marinta waa go'aan Maamul, waxay nootaayada xaq u leedahay in ay Racfaan u qaato Maxkamadda Sare;
2) Muddada Racfaankuna waa 30 (soddon) maalmood gudahood oo ka bilaabata maalinta Nootaayada la gaarsiiyey go'aanka shaqo ka joojinta ah; iyo
3) Haddii go'aanka Guddiga Rukhsad-bixinta looga qaadan-waayo Racfaan Maxkamadda sare wuxuu noqonayaa go'aan dhaqan-gal ah.

# CUTUBKA AFARAAD:
# GOLAHA MIDEYSAN EE NOOTAAYOOYINKA
## Qodobka 33aad:
## Qaab-dhismeedka Golaha Mideynta Nootaayooyinka

Golaha Mideynta Nootaayooyinka ee Heer Federaal iyo Heer Dawlad-goboleed wuxuu ka Kooban yahay xubnaha kala ah:

1) **Guddoomiye** xubin ka tirsan Maxkamadda Sare heer federaal ama maxkamadda Racfaanka heer dawlad-goboleed;
2) **Guddoomiye Ku-xigeen** Xubin ka tirsan Nootaayooyinka heer Federaal ama heer DXF; iyo
3) **Xoghaye** Agaasimaha Waaxda Garsoorka Wasaaradda Cadaaladda Federalka ama Wasaaradda Cadaaladda Dawlad-goboleedka.

## Qodobka 34aad:
## Awoodda Golaha

Awoodaha Golaha Mideynta Nooyaayooyinka waa:

1) Kormeeridda goobta ay nootaayooyinka ku shaqeynayaan iney tahay midku habboon iyo in kale;
2) Kormeeridda Nootaayooyinka in ay dhowraan waajibaadka loo xilsaaray iyo weliba sida ay ula dhaqmaan macaamiishooda;
3) Kormeeridda nootaayooyinka sida ay uxafidaan keydka dokumentiyada Xafiiskooda.
4) Iney ra'yigooda oo qoraal ah u gudbiyaan marka ay soo weydiistaan Hay'adaha ku hawl leh arrimaha la xiriira nootaayooyinka iyo sida ay u maamulaan keydkooda dokumentiyada;
5) Iney si joogto ah ula socdaan tirada Nootaayooyinka hawlgalka ku jira iyo Kuwa tababarrada soo dhammeystay;
6) Marka la soo weydiisto, xallinta Khilaafaadka ka dhexdhasha nootaayooyinka iyo dadka kale ha ahaadee Isu-celinta kaarar iyo dokumentiyo, amase arrimo la xiriira kharashyo ku saabsan xushmad la muteystay amase wax kasta oo kale oo ku saabsan hawlgalka arrimaha nootaayada.
7) Soo-jeedinta shaqo-ka-joojinta iyo rukhsad-kala-noqoshada Nootaayada si ay go'aan uga gaaraan cidda ay khuseyso

## Qodobka 35aad:
## Hawlaha Golaha

1) Hawlaha Golaha Mideynta Nootaayooyinka waa:
    a. Soo saarista Xeer Nidaamiye hagaya shaqadooda:

b. Fadhiga Golaha waxa isugu yeeraya Guddoomiyaha ama Ku-xigeenkiisa marka uu maqan yahay Guddoomiyaha;
c. Go'aannada Golaha waxay ku meel- marayaan cod hal dheeri ah.

2) Xoghayaha waa in uu uruuriyaaqoraallada kulamada, waana in uu keydiyaa dhammaan dokumentiyada la xiriirakulanka.
3) Guddoomiyaha Golaha ayaa awood u leh in uu soo saaro nuqullada qoraallada kulamada, waxaana saxiixaya Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Golaha;
4) Diiwaan-gelinta tababarteyaasha;
5) Soo bandhigidda shaabbada Rasmiga ah ee Nootaayada;
6) In Golahu sameeyo diiwaan u gaar ah Nootaayooyinka, uuna raacsan yahaysaxiixa Nootaayaha, ayna keydiyaan diiwaankaas.

**Qodobka 36aad:**
**Xarunta Golaha**

Xarunta Golaha Mideynta ee Heer Federaal waa Caasimadda JFS ee Muqdisho iyo Xarunta Golaha Mideynta oo noqoneysa Magaalo- madaxda Dawlad-goboleed kasta

**Qodobka 37aad:**
**Muddada Xil- Haynta Golaha**

Muddada Xil-haynta Golaha waa 3 (sano) sano oo la cusbooneysiin karo 1 (Hal) mar oo keliya, waxaana Dekreeto kusoo saaraya Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda ee Federaalka amase Wasiirka Caddaaladda ee Dawlad-goboleedka , kaddib marka uu Golaha heer Federaal amase heer Dawlad-goboleed u soo jeediyo cusbooneysiintaas.

**Qodobka 38aad:**
**Baabi'in**

Xeerkani wuxuu baabi'nayaa sharci kasta oo hor-imanaaya ama aan la soconKarin.

**Qodobka 39aad:**
**Dhaqangal**

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JFS.